Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جـمـهـوريـة الصـومـال الفيـدرالية
مكتب رئيس الوزراء

*The Federal Republic of Somalia*
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 101**

**04/06/2020**

**Xeerka Istiraatiijiyadda Qaran ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa 2020 - 2023**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad (a) iyo (d) ee Dastuuka KMG.

**Markuu arkay:** Soo-jeedinta Wasiirka Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka.

**Markuu arkay:** Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.95.06.20 ee 04/06/2020,** kuna saabsan ansixinta **Istiraatiijiyadda Qaran ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa 2020 - 2023,** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qabo in la meel mariyo Istiraatiijiyadda Qaran ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa 2020 - 2023

**Wuxuu meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.95.06.20 ee 04/06/2020,** kuna saabsan ansixinta **Istiraatiijiyadda Qaran ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa 2020 - 2023,** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

## Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Istiraatiijiyadda Qaran ee La dagaalanka Musuqmaasuqa 2020 - 2023.

## Qodobka 3aad

Istiraatiijiyadda Qaran ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa 2020 - 2023, waxa ay dhaqan-gelayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane Xasan Cali Khayre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

# ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA

# 2020 – 2023

**Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka, Xukuumadda JFS**

**XARUNTA DHEXE: WADADA ISBITAAL MARTINE, DEGMADA XAMAR-WEYNE, MUQDISHO**
**SANDUUQA BOOSTADA: 629, Hotline No. +2521 - 865880, E-mail: info@moj.gov.so icu@moj.gov.so**
**or website: www.moj.gov.so**

(اهدِنَــــا الصِّرَاطَ المُستَقِيمَ).

***Allow nagu hagaaji tubta toosan***

(وَلَا تَأْكُلُوا أَمْوَالَكُم بَيْنَكُم بِالْبَاطِلِ وَتُدْلُوا بِهَا إِلَى الْحُكَّامِ لِتَأْكُلُوا فَرِيقًا مِّنْ أَمْوَالِ النَّاسِ بِالْإِثْمِ وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ).

*"Ha cuninina hanti cid kale leedahay si xaq-darro ah hana siinina laaluush xukun-hayeyaasha (garsooreyaasha ka hor gelitaanka dacwadihiina) taasoo aad si ogaal ah ku cunaysaan qeyb ahaan hantida dadyow kale si dulmi ah"*

**Aayadda: [2:188] ee Suuradda Al-Baqarah.**

*"Sida aan rumeysan nahay kama ahan caan dhammaan Jamhuuriyadda Soomaaliya in marka qof noqdo wasiir, uu u adeego dantiisa iyo damacyadiisa gaar ahaaneed, iyo tan beeshiisa, qaraabadiisa ama degaan-doorashooyinkiisa. Tani waa mid cad oo ay dhammaan Soomaalida ku baraarugsan yihiin in ay qabyaaladi ka jirto maanta Jamhuuriyadda Soomaaliya, qabyaalada sida qotada dheer u baahsan waxaa dhiirri-geliyey dad u adeegaya danahooda gaarka ah. Sharciga iyo xeer-nidaamiyeyaashu waa in ay naga sarreeyaan, mar haddii xukuumadda – iyo qof kasta, muhiim ma ahan xil kasta oo uu hayo – waa in uu ixtiraamaa kuna shaqeeyaa sida uu qabo sharcigu. Waxaan ku warsanayaa in aad ii caddeyso aniga shakhsi ahaan oo leh qoraal dhammaan hantida aad leedahay inta aadan xafiis qaban. Hal-beegani wuxuu dadweynaha siinayaa kalsooni in xukuumaddu aysan u adeegeyn dan gaar ahaaneed, oo aysan wasiirradu u isticmaalayn hantida dadweynaha danahooda iyo damacyadooda gaar ahaaneed, balse in ay yihiin dad daacad u ah u-shaqeynta qaranka".*

**Mudane Cabdirisaaq Xaaji Xuseen, Ra'iisul Wasaare**
**Juun 1964**

*"Xukuumadaydu waxay adeegsanaysaa hal-beeg ah "xukuumad leh hufnaan iyo mabda'", sida uu ku can-baxay Ra'iisul Wasaarihii hore, Mudane Cabdirisaaq Xaaji Xuseen, Allaha u naxariistee"*

**Mudane Xasan Cali Khayre, Ra'iisul Wasaare,**
**Maarso 2017**

---

[1]"Xukuumaddayda waxaa hal-beeg u noqon doona Karti iyo Hufnaan sidii hal-hayska u ahayd Ra‟iisul Wasaarihii hore, Allaha u naxariistee, Mudane Cabdirasaaq Xaaji Xuseen"

# Tusm ooyin


I. SOO-GAABINNO ..... 3

II. ARRARTA RA'IISUL WASAARAHA ..... 4

III. MAHAD-CELINTA WASIIRKA CADDAALADDA ..... 5

IV. HORDHAC ..... 6

V. DANEEYEYAAL MUHIIM AH ..... 8

VI. HAB-SOCODKA QABYO-QORIDDA ISTIRAATIJIYADDA ..... 11

VII. HIMMILLOOYINKA ISTIRAATIJIYADDA ..... 11

VIII. SIYAASADDA IYO XAALADDA QAANUUN ..... 12

XI. BAARITAAN DIB-U-EEGIS: WADEYAASHA MUSUQ-MAASUQ IYO GOOBAHA KHATARTA AH ..... 14

1. ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA ..... 16

1.1. HOGGAAMIN: Isku-xirka Rabitaanka iyo Ku-hawlanaanshaha Siyaasadeed ..... 16

1.2. Hab-socodyo leh Daah-furnaan iyo Siyaasad Loo Dhan yahay ..... 18

1.3. Ilaalinta Kor-joogteynta Baarlamaanka ..... 19

1.4. Dhisidda "Hay'ado Isla-xisaabtan" ..... 19

1.5. Xoojinta Qaab-hawleedka Sharci-dejin ..... 20

1.6. Sinnaansho iyo Xeer-nidaamsani Maareynta Kheyraadka iyo Dakhli-wadaagga ..... 20

2) ISLA-XISAABTAN: Xoojinta Hufnaanta, Madax-bannaanida iyo Kartida Hay'adaha Muhiimka ah ..... 21

2.1. Hanti-dhawrid: Awood-u-siinta Xafiiska Hanti-dhawraha Guud in uu u Qabto hanti-dhawrida si Lixaad iyo Madax-bannaani leh ..... 21

2.2. SIR-DOON: Awood-siin Xarunta Warbixinta Maaliyadeed ee Soomaaliya ..... 22

2.3. IS-GARABSI: "Abuuridda Qaab-hawleed Is-garabsi Hay'adeed iyo Is-weydaarsi Macluumaad ..... 22

2.4. Baaris: Mihnadeyn iyo xoojin Kartida Adeegyada Booliska ..... 22

2.5. Dhisidda Kartida Ciidanka Booliska ..... 23

2.6. Garsoorid: Xoojin Hufnaanta Garsoor, Madax-bannaanida iyo Kartida ..... 23

2.7. Xoojinta Hufnaanta Garsoor ..... 23

2.8. Ilaalinta Madax-bannaanida Garsoor ..... 25

2.9. Hagaajinta Kartida Garsoor ..... 25

3. NIDAAMYO:" Daba-galka Lacagta" iyo Ilaalinta Hantida Dadweynaha ..... 26

3.1. Yareynta Khatarada Musuq-maasuqa ee Ururinta Dakhliga Dawladda ..... 27

3.2. Kombiyuutar-adeegsiga Hab-socodyada iyo Casriyeynta Adeegyada ..... 27

3.3. Fududayn Hab-raacyo ........ 28
3.3.1. Hagaajinta Waxbarashada Dadweynaha iyo Helitaanka Macluumaadka ........ 29
3.4. Baahinta Canshuur-dhaafitaanada ........ 29
3.5. Daacad iyo Mihnad Saraakiisha Canshuurta iyo Dakhli-ururinta ........ 29
3.6. Xoojinta Aaminaadda Gadashada iyo Abaal-marinada Dawladda ........ 30
3.7. Hagaajinta Fulinta iyo Kartida Gadashada ........ 30
3.8. Xakameynta Kharashka Badan ........ 31
3.9. Hagaajinta Daah-furnaanshaha Miisaaniyadda ........ 31
3.10. Soo-celinta iyo Maareynta Hantida Dawladda ........ 32
4. MAAMUL: Dhisidda Shaqaale Rayid ah oo leh Mudnaan-ku-saleyn, Mihnad, Loona Dhan Yahay ...... 33
4.1. Soo-nooleyn Dhaqanka Shaqaalaha Dawladda ........ 34
4.2. Hawl-qabadyo leh Qayaxnaan iyo Ujeeddo Shaqo-qoris, Horumar iyo Shaqo ka-eryid ........ 34
4.3. Ciqaabidda Dabeecadda Mabda'-la'aaneed ........ 35
4.4. Abaal-marinta Hufnaanta kan sameeya ........ 35
4.5. Mag-dhaw Quman oo Waqtiyeysan ........ 35
4.6. Horumarinta Meherada ........ 36
5. HAB-DHAQAN: Abuuridda Dhaqan Diidaya Musuq-maasuq ........ 37
5.1. Hagaajinta Waxbarashada iyo Baraaruga Dadweynaha ........ 37
5.2. Shaqaalaha Dawladda ........ 37
5.3. Dadweynaha Guud ........ 38
5.4. Bixinta Adeeg ay u siman yihiin Muwaadiniitu ........ 38
5.5. Caadiyeynta La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Heerka Hay'adeed ........ 39
5.6. Dhisidda Qaababka Looga Warbixiyo Musuq-maasuqa ........ 39
5.7. Dhisidda Qaababka Loo Cabbiro Musuq-maasuqa ........ 39
5.8. GEBANGABO ........ 39

## *I. SOO-GAABINNO*

**GLM** Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa.

**MGB** Maamulka Gobolka Banaadir.

**BDHS** Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

**WBD** Waaxda Baarista Dembiyada.

**XJFS** Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**DXF** Dawladaha Xubnaha Ka Ah Federaalka.

**HCAMMSH** Hay'adda Caalamiga ee Arrimaha Maan-dooriyeyaasha iyo Meel-marinta Sharciga.

**GKIQ** Guddiga Ku-meel-gaarka ah ee Soo-gadashada Qaranka.

**GAG** Guddiga Adeegga Garsoorka.

**IQLM** Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa.

**FIHQ** Faraca Iskuduwidda Hufnaanta Qaran.

**GMDQ** Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka.

**QHQ** Qorshaha Horumarinta Qaranka.

**HDWLMP Hay'adda** Dawlad-wanaagga iyo La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Puntland.

**CBS** Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

**DHL** Hal-abuurka Dib-u-soo-celinta Hantida La Xaday.

[2] Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa dhigan ahaan loogu yeerayaa "Xukuumadda"

## *II. ARRARTA RA'IISUL WASAARAHA*

Waxaan ku faraxsanahay in aan daah-furo Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Soomaaliyeed, 2020 – 2023, oo aanu salka u dhigno muddadii ugu horreysay. Baahsanaanta musuq-maasuqa oo lagu lamaanshay sar-gooyadiisa raad-reebyo ee dhaqaalaheena, amnigeena iyo samo-falka dadkeena waxay bixinayaan jawaab mug iyo iskuduwnaanshaba leh. Sanado badan oo fog gudahood, Soomaaliya waxaa laga fahamsanaa inay kamid tahay dalalka ugu musuq-maasuqa badan aduunka. Xukuumadeena hadda jirta waxaa ka go'an in ay bedesho fahamkan iyo in ay ku tallaabsato hoggaamin dhaqdhaqaaq ee ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa Soomaaliya.

Daweynta musuq-maasuqa waxuu xil ka saaran yahay 'dhammaan dawladda iyo bulshada' oo hannaan la yimaada. La-dagaallanka musuq-maasuqa waa shaqo laga rabo cid kasta: kuwa ku jira dawladda, hay'adaha gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah, dadweynaha guud iyo dhallinyarada, kuwaasoo laga doonayo in ay kaalin lixaad leh ka qaataan il-ku-haynta ajendahan si mustaqbalkoodu u noqdo mid ku dhisma asaasyo adag oo daacadnimo ku dheehan tahay. Go'aan-qaadashadan gudaheeda, horumarinta iyo hirgelinta istiraatijiyadda labadaba waxaa hagaya wadajirka daneeyeyaasha tirada badan oo ka kooban wakiilada Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (XJFS) ee heerarka federaalka iyo midda goboleedba, bulshada rayidka, iyo bulshada ganacsatada ah iyo la-wadaageyaasha caalamiga ah, halka ku habboon. Tani waxay suurta-gelinaysaa lahaanshaha dhaqdhaqaaqa la-dagaallanka musuq-maasuqa ee dhammaan iyo daah-furnaan dadaaladeena aan ku wajahayno musuq-maasuqa.

Mar haddii musuq-maasuqa ku baahsan yahay dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada, waxaa muhiim ah in gulufka kowaad ee falka lidka ku ah musuq-maasuqa uu ka bilowdo laamaha dawliga ah. Dhammaan hay'adaha dawliga ah waa in ay qaadaan tallaabooyinka looga hor-tegayo musuq-maasuqa. Haddaba, waxaan weydiisanayaa dhammaan xafiisyada dawladda in ay u dhug yeeshaan dhawaqan caddeynta leh, in ay uga hawl-galaan dhiifoonaan la-dagaallanka dhammaan arrimaha ku aaddan hawl-qabadyada musuq-maasuqa iyo in ay qaadaan tallaabooyin wax-ku-ool ah oo lagu wajahayo si dhaqsiyo ah hal-beegyada lagu taliyey ee uu ka kooban yahay dokumentigani.

Waxaa shakhsi ahaan iga go'an dagaal lid ku ah musuq-maasuqa, waxaana weydiisanayaa hoggaamiyeyaasha kale ee dawladda, qeybaha gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah, hay'adaha diiniga ah iyo bulshooyinka kala duwan ee dhammaan dalkeena in ay si firfircooni leh uga qeyb-qaataan. La-dagaallanka musuq-maasuqa wuxuu ahaa mid kamid ah kuwa u mudan ee hor-tebyada leh ee dawladda oo aan ku soo bandhignay barnaamijkeena xilligii dhismaha Xukuumadda JFS (2017). Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa, 2020 – 2023 waa agab lagu xaqiijinayo hor-tebyadaas. Aynu ka wada-shaqeyno in aan hirgelino dabacan istiraatijiyad iyo in aan hore ugu socono soo-celinta hufnaanta ee hay'adaheena qaran iyo dhisidda Soomaaliya oo ku xakameysan qiyam daacadnimo, daah-furnaan iyo isla-xisaabtan.

**Mudane Xasan Cali Khayre**

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

## III. *MAHAD-CELINTA WASIIRKA CADDAALADDA*

Waxaan jeclaan lahaa in aan u mahad-celiyo dhammaan hawl-wadeennada Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Garsoorka oo kaalin weyn ka qaatay diyaarinta hawsha asaasiga ah iyo qabyo-qoridda Istiraatijiyadan, gaar ahaan waxaan u mahad-celinayaa Qeybta Isku-xirka Hufnaanta Dalka ee Wasaaradda iyo Hay'adaha kala ah IDLO iyo UNDP kuwaasoo ku taageeray Wasaaradda kharashaadka shaqaalaha ku hawlanaa qoridda istiraatiijiyadda. Waxaan sidoo kale u Mahad-celinayaa dhammaan daneeyayaashii lala Kulmay inta ay socotay xog-ururinta istiraatijiyadan kuwaasoo kaga qeyb-qaatay fikrado wax-ku-ool ah.

Waxaan mahad gaar ah u celinayaa shaqaalaha Qeybta isku-xirka Hufnaanta dalka (QIH) gaar ahaan Dr. Mahad Mohamed iyo Suban Khalif kuwaasoo isku hawlay qoridda istiraatijiyan, waxaa sidoo kale mahadsan Abukato, Mohamed faarax iyo Saciid Birmad oo dib-u-eeegis ku sameeyey labada nuqul ee Soomaaliga iyo Ingiriisigaba dhanka sharciga iyo tarjumaadaba.

Soomaaliya gudaheeda, caddeyntu waxay muujinaysaa in musuq-maasuqu yahay dhib weyn oo haysta hab-sami-u-qabashada dhammaan adeegyada, oo uu ku jiro maamulka cadaaladda. Meelaha ugu ba'an ee saameynaysa musuq-maasuqa waa dhanka talinta sharciga (rule of law). Ma ahan buunbuunin in cadaaladdu dhimato marka musuq-maasuqu bulaalo. Marka nidaamka cadaaladda nafsadiisu, oo laga maleynayo in uu noqdo mid leh muhimad hufnaan leh, wuxuu noqday gorgortan, xakameynta musuq-maasuqa waxay noqotay mid aad u adag. Si kastaba, ka-hor-tagga musuq-maasuqa oo looga hor-imaanayo ciqaab wuxuu adkaynayaa ballan-qaad muhiim ah ee ku aaddan wajahaada dhibka musuq-maasuqa ee Soomaaliya.

Waan ogsoonahay in xukun-wanaaggu uu yahay furaha horumarka muddada fog, in lala dagaalamo xad-gudubka xag-jirnimo, iyo ka-hor-tegidda soo-noqodka iska-hor-imaadka. Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (IQLM) waxay u taagan tahay ku-hawlanaanta XJFS in ay gaarto dawlad-wanaag oo loo marayo ka-hor-tagga iyo niyad-jedbinta musuq-maasuqa. Istiraatijiyadani waxay matalaysaa geesinimo, ajenda dib-u-habayn loogu talo-galay in la dhiso qeyb dawli ah oo lagu qeexo adeeg oo aan looga faa'idaysan si gaar ah. Waxay diiradda saareysaa dadka, nidaamyada, iyo hay'adaha iyo dhisidda dhaqan ay hufnaantu tahay wax loo riyaaqo, halka musuq-maasuqu yahay wax la diido.

**Mudane Xasan Xuseen Xaaji**
Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka
Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# IV. HORDHAC

In kastoo ay jiraan qaabab dhinacyo badan leh, musuq-maasuqu waxaa sida guud lagu qeexaa in uu yahay "ku-gabood-fal awood laysku aaminay oo looga faa'idaysto si gaar ahaaneed[3]". Waxaa caadi ahaan loo kala saaraa mid culus, fudud ama siyaasad, dhammaan saddexduba si qayaxan ayey uga jiraan Soomaaiya. Musuq-maasuqa Soomaaliya gooni kuma ahan hay'ad kasta ama qeyb kasta. Kaba darrane, wuxuu ku faafsan yahay dhammaan goobaha nolosha dadweynaha: laga bilaabo siyaasadaha iyo wakiilada cadaaladda iyo amniga.

Haddii uusan jirin gobol, wadan ama bulsho ka bed-qaba, musuq-maasuq Afrikada dhacda Saxaaraha hoostiisa in loo tixgeliyo mid baahsan. Waxaa jira caddeyn soo jeedinaysa in musuq-maasuqa Soomaaliya uu yahay ugub iyo gar-dhalad (persuasive and systemic) labadaba. Cabbiridda musuq-maasuq iyo ururinta caddeynta si nidaamsan ee baaxadda iyo dabeecadda musuq-maasuqa waa caqabad ka jirta meel kasta. Sida waddan ka soo kabanaya dagaal sokeeye iyo qaran-la'aansho muddo dheer, Soomaaliya sida xaqiiqada ah ma ahan mid gooni ah. Si kastaba, xogta gaaban ee la hayo waxay muujinaysaa sawir xun. Laga bilaabo 2007, Daah-furnaanshaha Caalamiga ah ee *Tusmada Ra'yiyada Musuq-maasuqa* wuxuu si is-daba-joog ah geliyey Soomaaliya meel hoose. Marka la eego RAADKA Xaaladda Khatarta Laaluush, Soomaaliya waxay noqotay tan ugu liidata. Dalal gaaraya 190 oo uu qiimeeyey Bankiga Aduunka ee warbixintiisa Mas'uuliyadda Ganacsi 2019, Soomaaliya waxaa loo aqoonsaday tan ugu liidata waxqabadka ee dhinacyada fududaynta mas'uuliyadda ganacsiga. Qaramada heerka sare ee tusmada Bankiga Aduunka waxay muujinayaan qeybaha dawliga ah ee leh isla-xisaabtanka iyo waxtarka, oo ay si mug leh uga faa'iidaan ganacsiyada iyo bulshada. Haddaba, waxaa jira, aragti xoog leh in Soomaaliya dagaal kula jirto dhibaatada musuq-maasuqa.

Raad-reebyada waxyeello ee dhaqaaleed, bulsheed iyo siyaasadeed si wanaagsan ayaa loo diiwaan-geliyey. Musuq-maasuqa ayaa dood ahaan ah kan keliya oo noqonaya khatarta ugu weyn ee xasiloonida, cadaaladda iyo horumarka Soomaaliya. Wuxuu wiiqaa dadaalada dib-u-habaynta, cadaaladda, uga daraa saboolnimada iyo dhaqaale-xumida, weeciyaa sama-falka, niyad-jebiyaa maal-gashiga tooska ah ee shisheeye iyo wuxuu xaalufiyaa hufnaanta iyo aaminaadda Soomaalida ay ku qabaan madaxdooda iyo hay'adahooda. Waxyeellooyinkiisa dhanka amniga qaranka lama yareysan karo- musuq-maasuqa wuxuu galaa gacmaha kooxaha qas-wadeyaasha xag-jirka ah, isagoo xalaaleynaya ajendayaashooda iyo khatar-gelinta guulaha nabad-dhisidda nugul ee lagu tallaabsaday dhawrkii sano ee la soo dhaafay. Isku soo xoori, waa arrin nidaam dhaqso ugu baahan jawaab nidaamsan.

XJFS waxaa ka go'amn in ay xakameyso musuq-maasuqa iyo in ay hagaajiso guud ahaan dawladnimada. Qaran-dhisidda Soomaaliya waxaa laga sameeyey guulo la taaban karo. Iyadoo ay wehliso gargaarka saaxiibadeeda caalamka, dhawrkii sano ee u dambeeyey waxaa muuqday hirgelinta han-qabitaan qorshe dib-u-habayn loola jeedo horumarinta xaaladda ganacsiga iyo sare-u-qaadidiisa, oo leh koritaan loo dhan yahay oo mug leh isla markaana la xakameynayo musuq-maasuqa. Hor-tebyooyinka (priorities) Xukuumadda ee la shaaciyey waxaa kamid ah dhismaha Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka (DXF) oo shaqeyn kara, qabashada doorashooyin meel-mar ah, dib-u-habayn nidaamyada maareynta maaliyadda dawladda, xoojinta dhanka amniga, iyo bixinta adeegyada bulshada. Si kastaba, guusha Xukuumadda ee dhinacyadan waxay si ballaaran ugu xiran tahay kartida uu hoggaanka Soomaaliyeed u yeesho xakameynta musuq-maasuqa taasoo dhanka kale tusaysa xalaalnimada Qaranka si mug leh.

Si bilow ahaan ah, waxaa muhiim ah in la aqoonsado in aysan jirin 'hal-cabbir-ku fillan-dhammaan' (one-size-fits-all) oo xallinaya musuq-maasuqa. Halka siyaad-dejiyeyaal iyo xeel-dheereyaal ay si isku-mid ah isugu raacaan in si lixaad leh loola dagaallamo musuq-maasuqa, caddeyn ku saabsan kuwa ay yihiin istiraatijiyaha la-dagaallanka musuq-maasuqa ee aduun ahaan ayaa ugu waxtarsan baaqiga yar. Istiraatijiyad kasta ee la-dagaallanta musuq-maasuq waa inay ahaataa mid habboon haddii ay noqonayso mid shaqeyn karta ama xallaal. Sidaas darteed, dokumentigan siyaasadeed waxay u taagan tahay isku-day in loo aqoonsado dib-u-habaynada hor-tebyada leh ee ku hannaansan gaar-ahaanshaha xaqiiqooyinka Soomaaliya ee xag bulsheed, hay'adeed iyo siyaasadeed. Sidoo kale, XJFS waxay ku faraxsan tahay in ay soo bandhigto *Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa, 2020 – 2023*.

---

[3]Tani waa qeexitaan ay bixisay Hay'adda Daah-furnaanta Caalamiga ah,

## V. DANEEYEYAAL MUHIIM AH

Musuq-maasuq wuxuu ka dhacaa meel kasta isagoo saameeya cid kasta. Si kastaba, daneeyeyaasha hay'adeed ee muhiimka ah sida hay'adaha ku takhasusay la-dagaallanka musuq-maasuqa, wasaaradaha muhiimka ah, hay'adaha garsoorka, hay'adaha hanti-dhawrka iyo xildhibaanada baarlamaanka oo lagu daray daneeyeyaasha aan-dawliga ahayn sida bulshada ganacsiga, bulshada rayidka, warbaahinta madaxa-bannaan, iyo hay'adaha waxbarashada iyo cilmi-baarista.

Faraca Iskuduwidda Hufnaanta Qaranka (FIHQ) wuxuu hoos-imaanayaa Wasaaradda Cadaaladda ee XJFS. Faracu odorosayaa oo ku dadaalayaa in uu ka dhiso dawladda – heerar federaal, goboleed iyo degaaneed—isagoo u shaqeynaya heerarka ugu sarreeya ee mabaadi' iyo kalsooni. FIHQ wuxuu guud ahaan u xilsaaran yahay in uu ilaaliyo hufnaanta dhinaca dawladda iyo in uu kor u qaado dhaqan-hay'adeedka mabda'eed oo ku saleysan qiyamyada daah-furnaansho, isla-xisaabtan iyo mudnaansho.

Isagoo ah xafiiska iskuduwidda dhexe, FIHQ wuxuu leeyahay shaqooyinka gaar ahaaneed ee soo socda:

a) In uu u adeego sidii gacanta siyaasadda dawladda ee la-dagaallanka looga soo hor jeedo musuq-maasuqa sida horumarinta iyo dib-u-eegidda shuruucda la-dagaallanka musuq-maasuqa, siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha;
b) In uu gacan ka siiyo hay'adaha qeybta dawliga ah horumarinta, hirgelinta iyo kormeeridda qeybta iyo hay'adda- gaar ahaan qorsheyaasha la-dagaallanka musuq-maasuqa;
c) In uu xiriiriyo oo xoojiyo hay'adaha la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo isla-xisaabtanka ee dhinacyada shaqaaleynta, tababaridda iyo qalabaynta si loo xaqiijiyo waxtaridda iyo wax-ku-oolnimadda hawl-galladooda;
d) In uu caadiyeeyo qiyamyada mabda'eed iyo hal-beegyada ee dhammaan hay'adaha dawliga ah ee Soomaaliya ee dhinacyada waxbarashada, feejignaanta iyo tababaridda;
e) In uu ku xirnaado hawl-wadeennada aan-dawliga ahayn (sida ururada bulshada rayidka, bulshada ganacstada iyo warbaahinta madaxa-bannaan) ee soo-jeedin in la abuuro dhaqan iyo bulsho niyad jebisa oo diida musuq-maasuqa; iyo
f) In uu kaashado hay'adaha kale ee dawladda iyo caalamka si loo meel-mariyo hab-raacyo si firfircoon u wajahaya musuq-maasuqa ee ku aaddan hal-beegyada caalamiga ah.

Waxaa muhiim ah in FIHQ laga sooco Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa. Halka uu FIHQ uu ka yahay hay’ad xukuumadeed, Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqu waxaa dastuur ahaan loogu xilsaaray in uu ka madax-bannaan yahay xukuumadda. FIHQ ma lahan xil iyo awoodo baaritaan[4].


Si uu hore ugu wado hawlihiisa si waxtar leh iyo hab loo dhan yahay iyo in uu ka dhigo faraca mid isla-xisaabtan leh, FIHQ wuxuu qaabinayaa barnaamijyo hay’adeed isku-dhaf ah:

**Koox Ubuc Dawladeed ah** halka FIHQ uu ku xiran yahay daneeyeyaasha dawladda ee muhiimka ah:

1. Xafiiska Hanti-dhawrka Guud;
2. Xafiis Garyaqaanka Guud;
3. Garsoorka;
4. Xarunta Warbixinta Maaliyadeed;
5. Xafiiska Madaxweynaha JFS;
6. Xafiiska Ra’iisul Wasaaraha;
7. Wasaaradda Maaliyadda;
8. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;
9. Ciidanka Booliska Soomaaliyeed (Waaxda Baarista Dembiyada);
10. Hay’adda Dawlad-wanaagga iyo La-dagaallanka Musuq-maasuqa Puntland;
11. U-qeybsaneyaasha (focal points) Jubaland;
12. U-qeybsaneyaasha (focal points) Hirshabeelle;
13. U-qeybsaneyaasha (focal points) Dawlad-goboleedka Koonfur-galbeed;
14. U-qeybsaneyaasha (focal points) Galmudug; iyo
15. U-qeybsaneyaasha (focal points) Maamulka Gobolka Banaadir.
16. **XJFS-barnaamij hawl-wadeennada aan-dawliga ahayn** halka FIHQ uu ku xiran yahay daneeyeyaasha aan-dawliga ahayn sida qeybta gaarka loo leeyahay, ururada bulshada rayidka, iyo hay’adaha waxbarashada iyo cilmi-baarista.
17. **XJFS-barnaamij daneeyeyaasha caalamiga ah** halka FIHQ uu ku xiran yahay daneeyeyaasha goboleed iyo caalamiyeed.

---

4. Eeg Qodobka “Siyaasadda iyo xaaladda qaanuun”ee ku aaddan sharaxaadda xilka iyo awoodaha Guddiga La-Dagaallanka Musuq-maasuqa.


Guddiga La-Dagaallanka Musuq-Maasuqa
Xafiiska Gardoonka
Xafiiska Madaxweynaha PUNTLAND Hay'adda Dawlad-wanaagga iyo La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Puntland
Wasaaradda Cadaaladda Hirshabeele
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Xafiiska R/W iyo Madaxweynaha
Xafiiska Hanti-dhawraha Guud
Wasaaradda Maaliyada
Bulsho Ganacsi
FIHQ Wasaaradda Cadaaladda
Xafiiska Xeer-ilaaliyaha guud
Bulshada Rayidka
Ciidanka Booliska Soomaaliyeed
Bankiga Dhexe ee Soomaaliya
Xarunta Warbixinta Maaliyadeed
Wasaaradda Cadaaladda Jubaland
Garsoorka
Wasaaradda Cadaaladda Galmudug
Saxaafadda Xorta ah
Wasaaradda Cadaaladda Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed
Hay'adaha Waxbarashada & Cilmi-baarista

## VI. HAB-SOCODKA QABYO-QORIDDA ISTIRAATIJIYADDA

Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (IQLM) waxaa lagu horumariyey iyadoo loo maray hannaan wada-tashiyeed. Faraca Iskuduwidda Hufnaanta Qaran (FIHQ) wuxuu qabanqaabiyey wada-tashiyo is-daba-joog ah in uu ururiyo oo miisaamo ra'yiga dhammaan daneeyeyaasha muhiimka ah inta lagu gudo-jiro horumarinta IQLM. Wax-ku-darsiga laga helay xirmada soo socota ee wada-tashiyada daneeyaha wuxuu aqoonsaday hal-beegyada hor-tebyo iyo in uu gacan ka geystay hagaajinta dokumentiga siyaasadeed ee kama-dambaysta ah:

a) Wada-tashiyo leh kala-duwanaansho hay'adaha dawladeed ee federaal iyo goboleed ("Kooxda Ubucda ah");
b) Wada-tashiyo leh wakiilo ka socda bulshada rayidka ah, bulshada ganacsatada ah iyo machadyada waxbarasho iyo cilmi-baaris;
c) Hal-ka-hal wada-tashiyo ah ee leh Kooxda Ubucda ah ee hay'adaha dawliga ah;
d) Wada-tashiyo leh dhigano iyo xeel-dheereyaal goboleed;
e) Wada-tashiyo leh dhigano iyo xeel-dheereyaal caalami ah; iyo
f) Kullan meel-marin kama-dambays ah oo leh dhammaan daneeyeyaasha muhiimka ah.

## VII. HIMMILLOOYINKA ISTIRAATIJIYADDA

Dokumentigani wuxuu muujinayaa yoolka ay higsanayaan hoggaamiyeyaasha dawladda iyo daneeyeyaasha kale ee muhiimka ah ee ku aaddan jawaab wax-ku-ool iyo waxtarba leh ee musuq-maasuqa. Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (IQLM) waxaa looga gol leeyahay in:

1. Si hordhac ah loo miisaamo heerka hadda ee musuq-maasuqa Soomaaliya iyadoo la qiimeynayo wadeyaasha musuq-maasuqa iyo goobaha khatarta asaasiga ah, iyo dib-u-eegista hal-beegyada jira ee la-dagaallanka musuq-maasuqa;
2. Uu faro-geliyo heerarka qaanuuneed, farsameed iyo hay'adeed si loo soo saaro is-bedelo ballaaran ee ku aaddan afkaarta, siyaasadaha, qaab-dhismeedyada hay'adeed iyo qaab-hawleedyada la-dagaallanka musuq-maasuqa; iyo
3. Uu bixiyo wadiiqooyin ku aaddan iskuduwidda iyo middaynta dadaalada dawladda ee la-dagaallanka musuq-maasuqa.

**Aragtida** waqtiga fog ee IQLM (Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa) waa in la dhiirri-geliyo lana abuuro bisayl Soomaaliya oo lid ku ah musuq-maasuqa.

## VIII. SIYAASADDA IYO XAALADDA QAANUUN

### a) Qaab-hawleedka Siyaasad

*Qorshaha Horumarka Qaranka 9aad, 2020-2024* (QHQ-9aad) waa dokumentiga siyaasadeed ee u muhiimsan Soomaaliya. Si waafaqsan qorsheyaashiisa in la dhiso hay'ado waxtar iyo wax-ku-ool leh, QHQ wuxuu odorosayaa dhisitaanka "maamul dawladeed oo shaqeynaya oo kara in uu si wax-ku-ool ah u bixiyo adeegyo leh tayo iyo joogteyn oo ay helaan dhammaan muwaadiniinta ku nool idil ahaan xuduudaha dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". QHQ wuxuu si gaar ahaaneed u dejinayaa in "si mug leh loo yareeyo musuq-maasuqa iyo laaluushka ee dhammaan qabab kasta oo ay leeyihiin" iyo in "la horumariyo hay'adaha si leh wax-ku-ool, isla-xisaabtan iyo daah-furnaan ee dhammaan heerarka ay yihiin[5]".

Xusid mug leh ahaan, aaladda siyaasadeed waxay aqoonsanaysaa maqnaanshaha Hay'adaha la-dagaallanka musuq-maasuqa "Sharciyo. Hab-socodyo iyo nidaamyo si loo ciqaabo ama sharci-darro looga dhigo cod-gadashada" caqabad ahaan in loo dhamaado siyasadaha Qaran[6]. "QHQ-9aad wuxuu sidoo kale aqoonsnayaa tuhun musuq-maasuq ee ka jira hay'adaha amniga iyo garsoorka inay ka gaabiyen horumarka ku aaddan dib-u-habaynta qeybta Amniga[7]. Waxay u aqoonsanaysaa musussuq-maasuqa ka jira qeybta Amniga inay halis ku tahay Amniga Qaranka[8]. Si waafaqsan Qorsheyaashiisa in la dhiso Hay'ado leh wax-ku-oolnimo iyo waxtarnimo, QHQ ee 2020-2024 wuxuu adorosayaa dhismaha "Maamul Dadweyne oo shaqeynaya oo kari kara inuu bixiyo adeegyo tayo leh oo wax-ku-ool ah isla markaana joogto ah inay helaan dhammaan muwaadiniinta Dalka oo dhan ee JFS" [9]. QHQ wuxuu si gaar ah u dejinayaa in uu "si mug leh u yareeyo Musuq-maasuqa iyo Laaluushka qaabab kasta ay leeyihiin" iyo in uu "Horumariyo si leh wax-ku-oolnimo, isla- xisaabtan iyo daah-furnaan ee dhammaan hay'adaha heerar kasta oo ay yihiin"[10].

---

[5]Qorshaha Horumarka Qaran ee 2020-2024 Xukuumadda JFS bog lr.177
[6]Qorshaha Horumarka Qaran ee 2020-2024 Xukuumadda JFS bog lr.142
[7]Qorshaha Horumarka Qaran ee 2020-2024 Xukuumadda JFS bog lr.156
[8]Qorshaha Horumarka Qaran ee 2020-2024 Xukuumadda JFS bog lr.157
[9]Qorshaha Horumarka Qaran ee 2020-2024 Xukuumadda JFS bog lr. 81
[10]Qorshaha Horumarka Qaran ee 2020-2024 Xukuumadda JFS bog lr. 81

## b) Qaab-hawleedka Qaanuun

Musuq-maasuq waxaa lagu wajahayaa qaababka sharci-dejin ee soo socda:

**Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2012).**

Tixraacyada gaar ahaaneed ee musuq-maasuga oo xusan Dastuurka Ku-meel-gaarka ah, sharciga ugu sarreeya ee Soomaaliya waxaa laga dheehan karaa Qodobka 111(c), kaasoo xeerinaya dhismaha Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa oo u xilsaaran baarista eedaymaha musuq-maasuq ee ka dhaca hay'adaha dawladda.

**Xilka Guddigu waa:**

a) In uu sare u qaado oo xoojiyo hal-beegyada looga hor-tegayo lagulana dagaalamayo musuq-maasuqa si aad u leh wax-ku-oolnimo iyo waxtarnimo;
b) Horumarinta, fududaynta iyo gacan-siinta iskaashiga caalamiga ah oo la xiriira; iyo
c) Siyaasadaha la-dagaallanka musuq-maasuqa, iyo in uu sare u qaado hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo maareynta habboon ee hawlaha dawladda iyo hantida.

**Awoodaha Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa waxaa kamid ah:**

i. in uu ka hor-tago, baaro, isla markaana faafiyo eedaymaha musuq-maasuqa;
ii. in uu xanibo, qabto, la wareego ama celiyo faa'iido kasta oo lagu helo hawl fal-dembiyeed; iyo
iii. in uu gacan ka geysto soo-saaridda shuruucdaas iyo hal-beegyada kale ee lagama-maarmaanka u ah in si wax-ku-ool ah looga hor-tago oo la maxkamadeeyo xad-gudubyada fal-dembiyeed ee la xiriira musuq-maasuqa.

Si kastaba, erayada ku saabsan "daah-furnaan", "isla-xisaabtan" iyo "hufnaan" waxaa tilmaamaya qodobbo kala duwan ee Dastuurka oo lagu tixraacay Golaha Shacabka (Qodobka 68).

Aqalka Sare (Qodobka 75), Shaqaalaha Rayidka (Qodobka 115), Guddiyada Madaxa-bannaan (Qodobka 110), Ciidamada Amniga (Qodobka 127) iyo Qaanuunka Federaalka ee Arrimaha Maaliyadda (Qodobka 124).

**Xeerka Soo-gadashada, Abaal-marinada iyo Tuurista (2015)**

In kastoo aysan si buuxda u hawl-gelin, dhiman tahayna dhismaha hay'adda soo-gadashada, Xeerka Soo-gadashada, Abaal-marinada iyo Tuurista Dawladda waa la gudbiyey si uu u bixiyo xakameynta soo-gadashada laguna dabaqo dhammaan hay'adaha dawladda oo idil sida hay'adaha dawladda, dawladaha hoose, shirkadaha dawladdu leedahay, iyo hay'adaha kale dawladda. Xeerka waxaa hadda meel-marinaya Guddiga Ku-meel-gaarka ah ee Soo-gadashada Qaranka iyo hab-raacyadiisa, dhammeystirka hawshani waxay sugaysaa dhismaha rasmiga ah ee hay'adda soo-gadashada.

**Xeerka Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo Maal-gelinta Argagixisada (2016)**

Xeerka Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo Maal-gelinta Argagixisada waa la gudbiyey si loo xoojiyo oo la bixiyo kor-joogteyn badan ee ku aaddan qeybta maaliyada ee Soomaaliya oo kobcaysa. Xeerku wuxuu wajahayaa hawlo aad u ballaaran sida lacag-dhaqidda iyo maal-gelinta argagixisadda, caddeynta macaamilka iyo shuruudaha dhiifoonaan ee laga rabo xilliga lacag-bixinnada. Qodobka 10$^{aad}$ ee Xeerku si gaar ahaaned u lafa-gurayaa shakhsiyaadka ku hawlan siyaasadda (PEPs) kuwaasoo loola dhaqmo in ay leeyihiin "khatar sare" oo u baahan in lagu sameeyo kormeerid horumarsan iyo dhiifoonaa habboon.

## XI. BAARITAAN DIB-U-EEGIS: WADEYAASHA MUSUQ-MAASUQ IYO GOOBAHA KHATARTA AH

Suurta-gal ma ahan in lala diriro dhibaato aan la fahamsanayn. Dib-u-eegis asbaabta xididka musuq-maasuqa iyo halka uu ka dhaco waxay soo saarayaan istiraatijiyad wajahaysa xaaladda rasmiga ah. In kasta oo ay jirto xog aad u kooban ee dabeecadda iyo baaxadda musuq-maasuqa Soomaaliya, SQLM waxaa ku tollan wadeyaasha musuq-maasuqa iyo goobaha khatarta ee hoos ku xusan oo laga soo ururiyey la-tashiyadii lala yeeshay daneeyeyaasha.

### a) Wadeyaasha Musuq-maasuq ee Soomaalida Cusub

Dhaqan ahaan, Soomaaliya waa dal hanti-wadaag ah oo leh danayn dhaqan oo xoog leh ee cadaaladda, ixtiraam fog ee xuquuqda heshiisyada dhaqan-galka ah iyo hantida, iyo mabda' dhisan ee dhanka ganacsiga. *Qur'aanka Kariimka ah,* oo ay ixtiraamayeen dadka Soomaaliyeed muddo boqolaal sano ah, waxaa ku cad muhimadda dakhli *xalaal* ah – dakhli lagu kasbado shaqo iyo laaluush-la'aan, xatooyo, ama baad la'aan. Barnaamijkii ugu horreeyey ee la-dagaallanka musuq-maasuqa Soomaaliya waxaa laga dheehan karaa dhismaha qaranka Soomaaliyeed ee dawladdii xoriyad-qaadasha kaddib ee uu Madaxweynaha ka ahaa Aadan Cabdulle Cusmaan iyo ra'iisul wasaarihiisii, Cabdirisaaq Xaaji Xuseen oo ku caan-baxay dawlad leh "*karti iyo hufnaan*".

Si kastaba, ka sokow dadaaladooda ugu wanaagsan, musuq-maasuqu wuxuu wataa in uu ku sii bulaalo jamhuuriyadda cusub iyo maamulada ay lahaayeen, isagoo dhammeystiray qabsiga gebi ahaan qaranka muddadii taliskii keli-tashiga ee Maxamed Siyaad Barre. Soomaalida cusub ee maanta, sheekada musuq-maasuqa lama sheegi karo haddii aan hordhac looga dhigin sheeko kale: in uu yahay masiibo burbur ee qaranka Soomaaliyeed iyo baaba'a dhammaan astaamaha nolosha hay'adeed ee muddo ka badan labaatan sanadood.

Qaar kamid ah xaaladaha iyo bulaaliyeyaasha wada musuq-maasuqa Soomaaliya ee maanta waxay u baahsan yihiin sidan hoose:

## b) Nuglaanshaha Qaran

Ku baraarugga burburka qaran, waxaa jiray maqnaansho dheer ee hay'ado qaran oo xalaal ah ama firfircoonaan leh oo ay wehliso taariikh laga dhaxlay hunguriga anshaxa qaran. Maanta, Soomaaliya waxay ku sii jirtaa in lagu baadi-sooco in ay tahay qaran leh nuglaansho aan bogsoon. Inta badan, soddonkii sano ee la soo dhaafay, tamarta siyaasadeed waxay ku koobnayd soo-celinta nabadda iyo gaaritaanka deganaanshiyo siyaasadeed oo ka duwan arrimaha ay kamid yihiin isla-xisaabtanka iyo hufnaanta. Ka-gaabisyada, qaab-hawleedka qaanuun, hay'adaha horumarineed, hab-socodyada siyaasadeed ee shiiqinaya indheer-garadka iyo dhaqan ciqaab-la'aan waxay isku-xireen in ay abuuraan jawi dhiirri-gelinaya musuq-maasuqa.

### c) Cadaadisyada Dhaqaale-bulsheedka

Saboolnimada iyo shaqo-la'aanta ayaa ku baahsan Soomaliya. Waxaana wehliya mushaarooyin yar oo daaha, asbaabo sida xaalado khatar ah oo lagu shaqeeyo, sinnaan-la'aan ballaaran, dhaqan shaqo-siin oo eex ku saleysan, maqnaansho ujeed hay'adeed oo lid ku ah in la qalbi-jebiyo hawl-wadeennada qeybta dawliga ah iyo in la wiiqo dhiirranaanta in ay ku shaqeeyaan dacadnimo ama wax-soo-saaritaan. Waxaa lagu doodi karaa in cadaadisyadan iskudhiska ah ay ku boorinayaan hawl-wadeennada dawladda ay si sharci-darro ah u kordhinayaan dakhliyadooda rasmiga ah.

## d) Guddoon Dhaqan

Dhammaan Soomaaliya waxaa ka jira guddoon guud ee musuq-maasuq ee nolosha dadweyne. Qeyb ahaan, sabab la xiriira dheeraanshaha maqnaanshaha qaran iyo dabbinyadiisa – hay'adaha dawladda, adeegyada dadweynaha iyo kala-dambaynta qaanuun – badeecadaha dadweynaha uma muuqdaan in ay lahaanayaan dhanka dadweynahu. Dhaxalka arrintani waa in musuq-maasuqa aan loo arkin xad-gudub balse loo arko hab-dhaqan. Xaaladan waxaa uga sii daray hoggaansanaanshaha

qabiil, oo wada in uu la tartamo dawladda leh qaab-dhismeedyada rasmiga ah ee Qaranka. Adeegsiga shabakadaha kaalmada qabiilka ku saleysan si loo helo magacaabitaano siyaasadeed, qandaraasyo dadweyne iyo shaqo-siin dawladda ayaa weli ah hawl-qabad caan ah.

### e) Goobaha Khatarta Musuq-maasuqa

Goobaha khatarta musuq-maasuqa asaasiga ah ee hoos ku xusan waxaa lagu aqoonsaday (si ku saleysan shan hor-tebyo goobood ee la-dagaallanka musuq-maasuqa si dheeraad ah loogu kala miiray hoos):

a) Hab-socodyada doorashooyinka iyo siyaasadaha kale;
b) Kheyraad-qeybsiga iyo maareynta;
c) Maamulka ururinta canshuuraha iyo dakhliga;
d) Soo-gadashada dawladda;
e) Maareynta maaaliyadda dawladda;
f) Shaqaalaha rayidka; iyo
g) Ciidamada Booliska.

# 1. ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA

## *1.1. HOGGAAMIN: Isku-xirka Rabitaanka iyo Ku-hawlanaanshaha Siyaasadeed*

*"Waxaan aad ugu faraxsanahay in Golaha Wasiirradu uu oggolaaday in aynaan u dul-qaadan musuq-maasuq, in aanu wadajir ahaan uga wada shaqeyno si wadaag ah in aan la dagaalnno musuq-maasuqa….waxaan ballan-qaadayaa in aan ka shaqeeyo in aan baabi'iyo musuq-maasuq; sidaan u carabaabay markii ugu horreysay ee xil-qabashadayda, la-dagaallanka musuq-maasuqa waa hor-tebyada ugu sarreysa. In dalkan hore loo dhaqaajiyo, in la mideeyo dadka Soomaaliyeed, in la xaqiijiyo in 15^ka^ milyan ee Soomaaliyeed ee dalkan ku nooli ay helaan nololaha ay mudan yihiin, ma oggolaan karno in yari in ay yeesho sida ay jecel yihiin. Ma oggolaan karno musuq-maasuq in uu mugdi geliyo wiilasha iyo gabdhaha Soomaaliyeed ee maanta dhasha. Haddii ay taariikhdu noo xusuusanayso si naxariis leh, iyo haddii dadkeenu yihiin in ay helaan mustaqbal, waxaa lama-huraan ah in aanu wajahno musuq-maasuqa".*

***Mudane R/wasaare, Xasan Cali Kheyre, oo la hadlaya Golaha Wasiirrada oo ku gudo-jira dib-ugu-noqoshada sanadlaha, Nofeembar 2018.***

Hoggaamin siyaasadeed oo dhab iyo rasmi ah iyo isla-xisaabtan heerarka ugu sarreeya ayaa ah tan ugu muhiimsan ee hore loogu baahan yahay si loo gaaro guul iyo waaritaan istiraatijiyad kasta ee la-dagaallanka musuq-maasuqa. Hoggaanka sare ee XJFS waxaa ka go'an in hirgelin guul leh laga gaaro IQLM.

Mid kamid ah caqabadaha ugu weyn oo ay wajahayso Soomaaliya waa dhibka 'suuq-yaalka siyaasadeed' lagu kala-soocay ku-daboolnaanshaha kiro-raadinta ee xubnaha indheer-garad siyaasadeed iyo ganacsi.[11] Xafiiska dadweyne ee Soomaaliya waxaa loo fahamsan yahay in uu yahay meel si shakhsi ah looga hodmo ama urursi hantiyeed. Deganaansho-la'aanta siyaasadeed oo aan bogsashada lahayn iyo shaqooyinka aadaminimo waxaa macnahoodu yahay 'cun-markaad-adigu-karto' fekerka ah uu ka dhaqan-galo xukuumadda dhexdeeda.

Xukuumadda hadda jirta waxay si furan u muujisay dagaal lid ku ah musuq-maasuqa in uu yahay stiraatijiyad hor-tebyo leh. Bishii Feberaayo 2017, xilligii unkidda maamulka talada haya, hakinta musuq-maasuqu waxay ahayd mid kamid ah saddex bandhigyo ee ubucda ahaa oo uu soo gudbiyey Madaxweyne Maxamed Cabdullahi Maxamed 'Farmaajo'. Muddo aad u dhaweyd, War-murtiyeedka Fadhiga La-wadaaga Soomaaliya oo lagu meel-mariyey Brussels bishii Luuliyo 2018, Xukuumadda iyo bulshada caalamka waxay go'aansadeen in ay uga shaqeeyaan wadajir ahaan "qaadidda tallaabooyin muuqda oo joogto ah in la ilaaliyo oo la ballaariyo hufnaanta iyo isla-xisaabtanka ee maareynta maaliyadaha dawladda iyo kheyraadka iyo sidoo kale in la horumariyo qaab-hawleedyada qaanuuneed iyo hay'adeed si loo wiiqo musuq-maasuqa".

SQLM waxay ku kooban tahay goobaha hor-tebyo ee soo socda:

[11] *De Waal Alex (2017) Qoraal Aragtida Soomaaliya, 2017, Dugsiga Dhaqaalaha Iyo Cilmiga Siyaasadda ee London, UK*

Dagaal kasta ee wax-ku-ool ah oo lid ku ah musuq-maasuqa Soomaaliya waa in uu noqdaa "kor– hoos" oo uu ku jiro hoggaanka sare ee dalka wixii isaga hoos-yimaado. Haddii ay habboon tahay "cod meesha sare" saameyn wiiqitaan iyo in ay di'in doonto is-bedel afkaar dhaqan-bulsheed ee ku aaddan musuq-maasuqa. Madaxweynaha, Ra'iisul Wasaaraha, Af-hayeenka Baarlamaanka, iyo sidoo kale hoggaamiyeyaasha DXF, waa in ay yeeshaan wada-hadal qaran ee ku saabsan caqabadaha musuq-maasuqa iyagoo ku tilmaamaya muuqaaladooda iyo khudbooyinka ay u jeedinayaan dadweynaha.

Hoggaanka sare waa in uusan dhiirri-gelin oo keliya dagaalka lidka ku ah musuq-maasuqa balse waa in uu muujiyaa in uu noqdo tusaale. Aad by muhiim u tahay in hoggaamiyeyaashu aysan ahaan kuwa mabda' iyan wax la su'aali karo iyo in lagu leeyahay la-xisaabtan iyadoon loo eegin darajada ay leeyihiin. Si kor loogu qaado aaminaada muwaadiniinta ee maamulka dawladda, Dawladdu waxay horumarinaysaa nidaamka caddeynta hantida oo ay madaxda qaranka iyo xukuumadda, wasiirrada, iyo sharci-dejiyeyaasha aqalka sare iyo golaha shacabka ay ku qasban yihiin, iyo iyadoo ay kamid yihiin hab-raacyo qiraal cad iyo ansixin.

## 1.2. Hab-socodyo leh Daah-furnaan iyo Siyaasad Loo Dhan yahay

Musuq-maasuqa xilliga doorashooyinka waa caqabadda ugu weyn ee dimoqraadiyadda Soomaaliya. Qarsoonaan, siyaasadaha ay shiiqiyaan xeel-dheereyaasha waa in ay jid u furaan daah-furnaanta iyo ka-qeyb-qaadashada hab-socodyada siyaasadeed. Tallaabada leh ballaan-qaadka ugu badan in la qaso suuq-yaalka siyaasadeed (political marketplace) waa mariinka dooroshooyin toos ah, lagu kalsoonaan karo. Sidoo kale, Xukuumadda asaaska u dhigaysaa si guud ahaaneed, 'hal qof, hal cod' ee dooroshooyinka 2020. Bishii Juun 2018 kullankii Baydhabo uu ku yeeshay Golaha Amniga Qaranka, waxaa lagu go'aamiyey hannaanka doorasho ee 'hal qof, hal cod'. Qabyo-qoraal *Xeerka Doorashooyinka* ayaa loo gudbiyey Barlamaanka. Guddiga madaxa-bannaan ee dooroshooyinka qaranka wuxuu qorsheeyey oo dejiyey dib-u-habayno is-daba-joog ah si uu uga dhigo hab-socodka doorasho mid leh daah-furnaan dheeraad ah sida diiwaan-gelinta axsaabta siyaasadeed, sahminta tallaabooyin lagu yareynayo gadashada codadka sida kaarar aqoonsiyo xog-sireed oo elektaroonik ah iyo aalado cod-bixin oo elektaroonik ah.

## 1.3. Ilaalinta Kor-joogteynta Baarlamaanka

Mabda'a dastuuriga ah ee qeybinta awoodaha waxaa loola jeeday in la helo hubin iyo miisaan Qaranka gudihiisa. Hawsha kor-joogteynta baarlamaanka – oo ay ku jiraan baarista siyaasadaha iyo falalka dawladda, kormeeridda isla-xisaabtanka maaliyadeed ee laanta fulinta iyo waxtarnimada hawl-gallada, ka-wakiil-ahaanshaha masiirka iyo danaha muwaadiniinta – baahiyaha ay tahay in la ilaaliyo lana xoojiyo. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, gaar ahaan Guddiga Maaliyadda ee Baarlamaanka, waa in loo oggolaadaa in uu fuliyo kaalin kor-joogteyn ee habboon.

## 1.4. Dhisidda "Hay'ado Isla-xisaabtan"

**Guddiga Adeegga Garsoorka**

Sanadkii 2015 Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS waxay meel-mariyeen Xeerka Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka (GAG) kaasoo dhammeystay hab-raacyadii sharci-dejin ee loo baahnaa, Xeerkan wuxuu awood siinayaa in la xeer-nidaamiyo Garsoorka iyo gaar ahaan in uu gudo-galo Magacaabista hawl-wadeennada Garsoorka iyo Anshax-marintooda. Si kastaba, GAG wuxuu u baahan yahay in la yagleelo[13].

**Xafiiska Gardoonka**

Xafiiska Gardoonka ma dhisna weli wuxuuna wakiil ka yahay hay'ad muhiim oo hadda bannaan. Xukuumaddu waxay qaadi doontaa dadaalada ugu habboon si loo unko sharci lagu dhisayo Xafiiska Madaxa-bannaan ee Gardoonka. Hay'adda dastuurka ku dhisan waxaa loo awood-siiyey in ay baarto cabashooyinka ka yimaada xubnaha dadweynaha ee khuseeya fal-maamuleedka hay'ad ama sarkaal kasta ee dawladeed oo ay ku jirto haddii saraakiishani ay u dhaqmaan si xaq-darro ah ama "fal leh qaab musuq-maasuq" (111J (5) (a) ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS).

**Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa**

*Xeerka Dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa* wuxuu si buuxda u dhammeystay dhammaan hab-raacyadii sharci-dejin ee loo baahnaa si waafaqsan Dastuurka Ku-meel-gaarka ee JFS, waana dhaqan-gal Xeerkani hadda. Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka ee Xukuumadda JFS waxay hadda gacanta ku haysaa sidii ay u dhammeystiri lahayd dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa, iyadoo la marayo dhammaan hab-raacyada uu tilmaamayo Dastuurka KMG ah ee JFS iyo Xeerarka kale ee dhaqan-galka ah. Kaddib dhammeystirkiisa, Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (GMLM) waxaa laga filayaa in uu qabto barnaamijyo iyo hawlo mug leh ee la-dagaallanka musuq-maasuqa.

Marka la eego heerka goboleed, Dawlad-goboleedka Puntland waxay dhisatay 'Hay'adda Dawlad-wanaagga iyo La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Puntland' (HDWLMP) sanadkii 2017, hay'addii u horreysay ee nooceeda ah ee laga dhiso wadanka. Si ku aaddan FIHQ, XJFS waxay dhisaysaa xiriirkeeda ay la yeelanayso HDWLMP ee ku saabsan ujeeddooyinka is-barasho saaxiibnimo iyo macluumaad-wadaag. HDWLMP waxay kaloo gacan ka geysanaysaa si DXF ee kale si fudud ugu dhisan lahaayeen dadaaladooda la-dagaallanka musuq-maasuqa sidaas awgeed musuq-maasuqa waxaa lagu xakameynayaa heer kasta oo dawladda kamid ah.

## 1.5. Xoojinta Qaab-hawleedka Sharci-dejin

Si loo adkeeyo ka-go'naanshaheeda ku aaddan dagaalka lidka ku ah musuq-maasuqa, Soomaaliya waxay meel-marinaysaa Heshiiska QM ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa. Xukuumaddu waxay xoojinaysaa qaab-hawleedka sharci-dejinta ee gudaha dalka iyadoo sameynaysa *Xeerka Hawl-qabadyada Musuq-maasuq (Corrupt Practices Act)* oo lahaanaya qeexitaano xad-gudub oo mug leh shuruudo dhaqan-gelin, Xeerka Anshaxa Hoggaaminta (Leadership Conduct Act) oo xeer-nidaaminaya anshaxa saraakiisha dadweyne, iyo *Xeerka Dhawridda Caddeyn-bixiyeyaasha* oo ilaalinaya caddeyn-bixiyeyaasha marka ay warbixin (caddeyn) ka bixinayaan xad-gudub lagu kacay.

## 1.6. Sinnaansho iyo Xeer-nidaamsani Maareynta Kheyraadka iyo Dakhli-wadaagga

Soomaaliya waxay leedahay suurta-gal ahaan kheyraad dabiici ah oo mug leh oo weyn ugu baahsan qeybo ballaaran, oo leh suurta-gal ahaan in ay soo saaraan hawl dhaqaale oo mug leh. Si kastaba, ilaa si daah-furnaan iyo sinnaansho leh loo maareeyo, dakhliyada kheyraadka dabiiciga ahi waxay abuurayaan musuq-maasuq halis ah iyo khataro iska-hor-imaad. Maadaama Soomaaliya waddo in ay qeexdo hannaankeeda federaaliga ah, ballan-qaadid xallal siyaasadeed ayaa laga gaaray dakhli-wadaagga u dhexeeya ee heerarka kala-duwan ee dawladda. Iyadoo iskaashiga dawladaha dhexdooda ah uu dhiirri-gelin leeyahay, qoondeynta dakhli ee u dhexeeya saddex heer ee dawladda ma noqonayo oo keliya mid leh sinnaansho iyo daah-furnaan balse uu sidoo kale ku xaniban qaab-hawleed sharciyeed iyo xeer-nidaamin meel-mar ah.

[13]Tan waxaa faahfaahiyey faqradda "Isla-xisaabtanka: Xoojinta hufnaanta, Madax-bannaanida & Kartida hay'adaha muhiimka ah".

# 2) ISLA-XISAABTAN: Xoojinta Hufnaanta, Madax-bannaanida iyo Kartida Hay'adaha Muhiimka ah

***"Haddii qof wixii lagu aaminay laga waayo, asagana waa in la eryo [laga qaado xilka]"***

***Mudane Ra'iisul Wasaare, Cabdirisaaq Xaaji Xuseen, oo ka digaya cawaaqibyada lunsashada kheyraadka Qaranka 1964***

Musuq-maasuq gaar ahaan waa sun markay is-garabsadaan dembi-qabad-la'aan maadaama uu dhalayo qalbi-jab iyo dhiirri-gelin musuq-maasuqlaha. Waa muhiim in shakhsiyaadka iyo saraakiisha ay lahaadaan la-xisaabtan iyadoon loo eegin darajadooda iyo xubinimadooda. Saddex hay'adood oo muhiim ah – hay'adda sare ee hanti-dhawrka, booliska, iyo maxkamadaha – waxay kaalin mug leh ka qaadan karaan xakameynta musuq-maasuqa iyagoo la-xisaabtan gelinaya musuq-maasuqleyaasha. Si kastaba, hay'adahan nafsadoodu waxay noqon kar aan musuq-maassuqleyaal laga rabo faro-gelin. Sidaas darteed, awoodda in si guul ah loo daba-galo, loo baaro, loona xukumo musuq-maasuqa ka jira Soomaaliya waxay ku xiran tahay hufnaanta, madax-bannaanida iyo waxtarka hay'adahan.

IQLM waxay aqoonsan tahay tallaabooyinka hor-tebyo ee soo socda:


## 2.1. Hanti-dhawrid: Awood-u-siinta Xafiiska Hanti-dhawraha Guud in uu u Qabto hanti-dhawrida si Lixaad iyo Madax-bannaani leh

Haddii si quman loo maareeyo, hanti-dhawridda dawladda ee hay'adaha hanti-dhawrka sare waxay noqon karaan aalad waxtar leh ee daba-galka iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa. Xafiiska Hanti-dhawraha Guud wuxuu leeyahay awood in uu kor-joogteeyo oo warbixin ka bixiyo dakhliga iyo kharashka dawladda si loo xaqiijiyo isla-xisaabtanka maaliyadeed ee dhinaca dadweynaha. Awoodda xafiiska in loo fuliyo hanti-dhawridda si madax-bannaan, sida lagu damaanad-qaaday Dastuurka Ku-meel-gaarka ah, waa in waqti kasta la ilaaliyo. *Sharci Hanti-dhawr* ee saameyntan leh oo waafaqsan hawl-qabadyada ugu wacan ee caalamiga ah waa in la soo saaraa.

## 2.2. SIR-DOON: Awood-siin Xarunta Warbixinta Maaliyadeed ee Soomaaliya

Xarunta Warbixinta Maaliyadeed (XWM) waa Xarunta Sir-doonka Maaliyadeed ee ugu muhiimsan Soomaaliya, iyadoo u xil-saaran inay kormeerto, taxliiliso, baartana hawsha maaliyadeed ee la tuhunsan yahay. In kastoo XWM awoodeeda hawl-gal la hagaajiyey sanadihii dambe, awoodda kor-joogteynteeda ay wiiqday da'yarideeda iyo sidoo kale caqabad mug leh oo hortaagan Xarunta Qeybta Maaliyadeed ee Soomaaliya.

## 2.3. IS-GARABSI: "Abuuridda Qaab-hawleed Is-garabsi Hay'adeed iyo Is-weydaarsi Macluumaad




Waxaa inta badan arrinta Soomaaliya ah in hay'adaha kor-joogtaynta iyo dhaqan-gelinta ee sare ku tilmaaman ay u hawl-galaan si gooni gooni ah halkii ay is-garabsan lahaayeen si loo hagaajiyo macluumaad is-weydaarsiga iyo is-kaashiga, si looga badbaado faragelin iyo in lagu tallaabsado dadaallo wadajir ah oo u dhaxeeya Hay'adahan taabo-galka ah iyo Koox-hawleed u xilsaaran la dagaalanka musuq-maasuqa oo ka kooban Hay'adu dhawr ah.

## 2.4. Baaris: Mihnadeyn iyo xoojin Kartida Adeegyada Booliska

### *2.4.1. Hagaajinta Mihnadda iyo Hufnaanta Booliska*

Ku aaddan wejiga meel-marinta sharciga, aaminaada iyo mihnadda ciidanka booliska Soomaaliyeed (SPF) wuxuu u baahan yahay in dhaqso loo xoojiyo. Diiwaan-gelin tiro-koob elektaroonik ahaaneed ee dhammaan ciidanka booliska ee dalka oo dhan waxay noqotay tallaabo kowaad oo muhiim ah si loo hagaajiyo maareynta iyo la-xisaabtanka CBS. Si kastaba, hay'addu waxay sii waddaa in ay wajahdo gaabisyo kalsooni oo halis ah. Boolisku uma meel-mariyo go'aannada garsoorka qaab leh kalsoonaan iyo joogteyn. Waxaa soo if-baxaya cabashooyin tilmaamaya in saraakiil CBS qaarkood ay ku kici karaan qalqaalin iyo qaadasho laaluush marka ay ku gudo-jiraan ama bannaanka ka joogaan hawsha

baaritaanada booliska. Wasaaradda Amniga Gudaha waxay kala shaqeysaysaa CBS in la sameeyo lana dhaqan-geliyo Xeerka Asluubta iyo Anshaxa oo qeexaya hawl-qabadyada mihnadeed ee booliska iyo sidoo kale hab-raacyada anshax-marineed iyo nidaamyada kor-joogteynta. Mabaadi'da tababarid oo leh qaab aqoon-isweydaarsiyo iyo siminaaro ayaa la siinayaa dhammaan hawl-wadeennada si loogu suurta-geliyo in ay fahmaan oo ixtiraamaan xeerarka dhaqan-galka ah ee asluubta oo ku aaddan sharafta iyo waxqabadka habboon ee shaqooyinkooda.

## 2.5. Dhisidda Kartida Ciidanka Booliska

Si waafaqsan hannaanka cusub ee hawlaha booliska, dib-u-habayno kale duwan iyo barnaamijyo karti-dhisid ayaa la dejiyey si loo hagaajiyo wax-ku-oolnimada CBS si ay uga fal-celiyaan khataraha amni ee jira. Si kastaba, tixgelin yar ayaa la siiyey kartidooda ku aaddan baaritaanka maaliyadeed iyo dembiyada dhaqaale sida musuq-maasuqa. Marka eedaynta musuq-maasuqa loo soo gudbiyo CBS, waa mas'uuliyadda Waaxda Baarista Dembiyadda (CID) in ay baaraan dacwada. Kartida hawl-gal ee WBD (CID) ee in la socodsiiyo dacwadaha waxay u baahan tahay in la horumariyo. Si leh wax-ku-oolnimo iyo maamulid sugan, farac takhasuseed waa in laga helo WBD (CID) dhexdheeda oo u xilsaaran baaritaanka fal-dembiyeedyada maaliyadeed/dhaqaale.  Sidoo kale, WBD (CID) waxay u baahan tahay in ay hagaajiso iskaashiga iyo macluumaad-is-dhaafsiga hay'adaha u-faro-dhuudhuuban, gaar ahaan Xarunta Warbixinta Maaliyadeed, faraca sir-doonka maaliyadeed ee Soomaaliya oo kor-joogteyn iyo baaritaan ku sameeya hawlaha maaliyadeed ee la tuhunsan yahay.

## 2.6. Garsoorid: Xoojin Hufnaanta Garsoor, Madax-bannaanida iyo Kartida

Hufnaanta dadweynaha ee garsoorka waa muhimadda ugu sarreysa ee bulshada casriga dimoqraadiga ah. Uma suurta-gal ahan garsooreyaasha in ay eex-la'aan u garsooraan haddii goobta shaqo nafteedu ay musuq-maasuqsan tahay. Waxaa jira tuhumo laga qabo in musuq-maasuq ka jiri karo maxkamadaha Soomaaliya kaasoo isa soo taraya iyo in maxkamadaha rasmiga ahi ay kamid yihiin meelaha ay ka jirto kalsooni-xumidda dadweynaha dhanka arrimaha xallinta khilaafka ee Soomaaliya.

## 2.7. Xoojinta Hufnaanta Garsoor

Si loola dagaallamo musuq-maasuqa ee heerarka garsoorka, Xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare wuxuu sameynayaa xeerar asluub oo xeer-nidaaminaya asluubta iyo hawlaha saraaakiisha iyo hawl-wadeennada garsoorka. Waxaa intaas dheer, garsoorku waa in uu meel-mariyaa hadal-qiraal mabaadi'da asluubta garsoorka, oo tixgelin siinaya *Mabaadi'da Asaasiga ah ee*

*Asluubta Garsoorka* (isagoo dhisaya hal-beegyada caalamka ee la aqoonsan yahay ee ku aaddan asluubta garsoorka). Garsoorku waa in uu xaqiijiyaa in hadal-qiraalkan mabaadi' lagu faafiyo si ballaaran garsooreyaasha iyo adeeg-heleyaasha. Mabaadi'da tababaridda oo leh qaabab aqoon-isweydaarsiyo iyo siminaaro waxay u baahan yihiin in loo fuliyo in la kordhiyo taxadarka garsoor ee lidka ku ah dhammaan qaababka musuq-maasuqa. Ugu dambayn, garsooreyaashu waa inay ixtiraamaan kaalinatooda shaqaale dadweyne ahaan ka kor ama ka sare danahooda shakhsiyeed kuna habboon caqiidooyinkooda dhexe ee mihnadeed ee dhinacyada hufnaanta, daah-furnaanta, dhexdhexaadnimada iyo isla-xisaabtanka.

Si wehlisa tan, waxaa jira baahi in wax la baro dadweynaha ee kaalinta muhiimka ah in garsoorku qaato iyo muhimadda goobta shaqo oo soo bandhigaya hal-beegyada ugu sarreeya ee hufnaanta.[4)] Nidaam cabashooyinka dadweynaha oo meel-mar ah in uu sharxo sida iyo cidda ay tahay in ay agaasinto baahiyaha cabashooyinka oo la doonayo in si dhaqso ahaan loo yagleelo.

Sidaas darteed, wacdiyada hufnaanta ee maxkamadda ka dhaca ayaa si wanaagsan loo dhegaystaa loona gudbiyaa.[5)] Si la xiriirta, dhammaan anshaxa maxkamadaha wuxuu u baahan yahay in la xoojiyo. Maqnaanshaha Guddiga Adeegga Garsoorka (JSC), hawlaha anshaxa habboon waxay u baahan yihiin in lagu meeleeyo baaritaan iyo ciqaabo. In loo diro baaq lama-huraan u ah xakameynta ee kuwa noqonaya xad-gudbeyaasha, dacwooyinka la soo gudbiyey ee hawl-qabadyada musuq-maasuq waa in loola dhaqmaa si leh dhexdhexaadnimo, dhabnimo iyo daah-furnaansho ee cabashooyinka la qabtay iyo tallaabada la qaaday ee la baahiyey.

---

[4]Kaalinta waxbarashada dadweyne waxaa lagu ballaariyey hoos ee qodobka "Dhaqan: Abuuritaanka dhaqan diidaya musuq-maasuqa

5Nidaamyada cabashooyinka dadweynaha ama hawlaha warbixin waxaa lagu ballaariyey hoos ee faqradda "Dhaqamo: Abuuraya Bulsho diidaysa Musuq-maasuqa"

## 2.8. Ilaalinta Madax-bannaanida Garsoor

Qeybinta awoodaha waxay matalaysaa dammaanadda asaasiga ah ee madax-bannaanida garsoorka. Waxaa muhiim ah in Maxkamadaha Soomaaliyeed laga ilaaliyo cadaadiska siyaasadeed ama la xakameeyo. Xukuumaddu waxay la shaqeynaysaa garsoorka iyo daneeyeyaasha ay khusayso si loo dhiso Guddiga Madaxa-bannaan ee Adeegga Garsoorka (GMAG) oo mas'uul ka ah arrimaha, sida magacaabidda garsoorka iyo falka anshax-marineed. Ugu dambayn, kheyraad misaaniyadeed oo ku filan lehna madax-bannaani ayey u baahan yihiin in loo qoondeeyo garsoorka si loo hagaajiyo adeegga cadaaladda lana ilaaliyo madax-bannaanida garsoorka.

## 2.9. Hagaajinta Kartida Garsoor

Karti iyo dhiifoonaan waa fool-horaadyada asaasiga ah ee waxqabadka looga baahan yahay xafiis garsoor. Hor-tebyo dabooli karta waa in la siiyaa sidii loo horumarin lahaa kartida dadeed iyo hay'adeed ee maxkamadaha Soomaaliya. Machad tababar garsoor wuxuu u baahan yahay in la dhiso si loo hagaajiyo horumarinta mihnadeed ee garsooreyaasha si guud ahaaneed, halka xad-gudubyada culculus sida musuq-maasuqa lagu tuhunsan yahay, waxaa jiraya baahi loo qabo tababar takhasuseed iyo dhismaha maxkamad gaar ahaaneed oo ku dhex jirta garsoorka si loo maareeyo dacwadahaas. Ka sokow tiro-yarida wakiilada qaanuun iyo garsoor ee Soomaaliya iyo helitaanka cadaalad oo xaddidan, waxaa jira baahi ku aaddan hal-beegyo lixaad leh oo badan ee lagu soo galo mihnadda qaanuun iyo rukhsad-siinta garsooreed. Si ku aaddan tallaabadan, qabyo-qoraalka *Xeerka Qareenada*, oo dhisaya Ururka Qareenada isla markaana dejinaya shuruudaha looga baahan yahay oggolaanshaha hawl-qabadka sharci, wuxuu u baahan yahay in Baarlamaanku anisixiyo. Wehlin ahaan, kartiyada maareynta dacwada iyo adeegsiga teknoolojiyada casriga ah- gaar ahaan adeegsiga keyd-kombiyuutareed ee hab-socodyada garsoor oo lagu noqon karo- waxay u baahan yihiin in la hagaajiyo si loo bixiyo adeegyo maxkamadeed oo leh waxtar iyo waqtiyeysnaan oo dhankooda yareynaya hawl-gallada maxkamad-adeegsadaha iyo fursadaha musuq-maasuqa.

# 3. NIDAAMYO:" Daba-galka Lacagta" iyo Ilaalinta Hantida Dadweynaha

> "Waxaa laguugu aaminay dakhliyo canshuur laga soo ururiyey muwaadiniin. Waxaan kuugu nasteexaynayaa in aad ka fogaato qof ahaan nooc kasta oo musuq-maasuq ee jira.  Waxaan ugu baaqayaa hawl-wadeennada Wasaaradda Maaliyadda in ay gacan-siiyaan hoggaanka cusub ee Wasaaradda si ay u hirgeliyaan hab-socodkan cusub ee isla-xisaabtanka"
>
> ***Mudane Ra'iisul Wasaare Xasan Cali Khayre oo la hadlaya hoggaanka cusub ee Wasaaradda Maaliyadda Federaalka xilligii***

Maamul maaliyadeed oo hufan ayaa leh muhimad ballaaran ee xukuumad kasta. Dal leh saaameyn iska-hor-imaad ee wajahaya caqabado dhaqaale oo xun sida Soomaaliya, waxaa jira ankee baahi mug leh in la xaqiijiyo maareynta maaliyadeed ee dawladda iyo siyaasadda dhaqaale ay yihiin aalado waxtar u leh horumarka ummadda.  Labadii sano ee la soo dhaafay, XJFS waxay ku tallaabsatay arrimo mug leh ee dib-u-habayno dhaqaale, kuwaasoo si guul ah u hirgalay. Natiijo ahaan, waxaa jira kalsooni ballaaran ee nidaamyada dalka Soomaaliya.

**Dib-u-habaynadan waxaa kamid ah:**

a) dib-u-habayn mushaar-bixin, iyadoo dhammaan shaqaalaha dawladda toos loogu mushaar siiyo xisaabaadkooda banki halkii ay u heli jireen cadaan ahaan ama cid kale oo loo marsiiyo;
b) diiwaan-gelin xog-qarsoodi ee hawl-wadeennada amniga ee xaqiijinaya lambaradooda iyo aqoonsiyadooda;
c) casriyeynta hawlaha ururinta dakhliga, oo oggolaanaya keydinta dakhliga canshuurta oo toos loogu shubo Bankiga Dhexe ee Soomaaliya (BDHS), oo koobaya hakadka lacagta iyo fursado kaayasho;
d) ururinta dhexe ee dalkhliga ee laga soo ururiyey dhammaan wasaaradaha, waaxyaha iyo wakaaladaha ee ay qabato Wasaaradda Maaliyadda;
e) hay'adaynta adeegyada canshuurta waxay caddeynaysaa dhismo ballaaran iyo Xafiis Dhexe ee Canshuur-bixiyeyaasha;
f) hawsha ku aaddan Sharciga Isgaarsiinta Qaranka oo wada u xaaraya xeer-nidaaminta iyo ururinta dakhliga ee shirkadaha isgaarsiinta; iyo

---

[6] Waxaa laguugu aaminay dakhliyo canshuur laga soo ururiyey muwaadiniin. Waxaan kuugu nasteexaynayaa in aad ka fogaato qof ahaan nooc kasta oo musuq-maasuq ee jira.  Waxaan ugu baaqayaa hawl-wadeennada Wasaaradda Maaliyadda in ay gacan-siiyaan hoggaanka cusub ee Wasaaradda si ay u hirgeliyaan hab-socodkan cusub ee isla-xisaabtanka". Ra'iisul Wasaare Kheyre.

Waxaa sidoo kale jira adeegyo sharci-dejin si loo hagaajinayo hufnaanta maaliyadeed iyo daah-furnaansho oo ay wehliso iyadoo dhawaan gudbin loogu sameeyey Baarlamaanka *Sharciga Maareynta Maaliyadda Dawladda, Sharciga Hanti-dhawrka, Sharciga Dakhliga, iyo Sharciga Shirkadaha.*

Si kastaba, waxaa socda wax u noqonaya fursado mug leh musuq-maasuqa eel eh siyaabo kala duwan oo ku aaddan maareynta khasnadda. SQLM waxay dejinaysaa tallaabooyinka soo socda si haqdhaqaaqyada maaliyadeed ee dawladda looga dhigo kuwa leh daah-furnaansho iyo isla-xisaabtan dheeraad ah.

## 3.1. Yareynta Khatarada Musuq-maasuqa ee Ururinta Dakhliga Dawladda

Dakhliga laga soo ururiyey canshuuraha wuxuu yahay wadnaha dhabta ah ee heshiiska bulsho ee ka saaran muwaadiniinta Qaranka. In kastoo horumar mug leh dhawaan laga sameeyey dhaqaajinta dakhliga, the XJFS waxay la dagaalamaysaa in ay dakhli ku filan ka soo saarto cashuurta ee qeyb ahaan saameeya caqabadaha amniga iyo meel-marinta. Fakashooyinka dakhliga waxay si lama-huraan ahaan u turjumayaan helitaan yari maaliyadeed ee qabashada adeegga dawladda, tas-hiilaadka iyo yoolalka siyaasadeed ee kale. Tani, dhanka kale, waxay xaalufisaa aaminaada dadweynaha iyo hufnaanta lagu qabo xukuumadda. Sidaas awgeed, musuq-maasuqa ururinta dakhliga waa in la xakameeyo iyadoon ahayn oo keliya daadka tooska ah awgiis, balse ah culeysyo siyaasad-amniyeed awgood ee jira. Tallaabooyin gaar ahaaneed oo looga hor-tegayo laguna yareynayo musuq-maasuqa maamulka canshuurta waxaa kamid ah:

## 3.2. Kombiyuutar-adeegsiga Hab-socodyada iyo Casriyeynta Adeegyada

Adeegsiga teknoolojiyada in si wax-ku-ool iyo daah-furnaan leh loo hagaajiyo hab-socodyada xukuumadda wuxuu leeyahay ballan-qaad weyn ee Soomaaliya. Ka-gudubka hawl-gallada gacanta ee loo gudbayo kombiyuutar-adeegsiga waxay hagaajinaysaa wax-ku-oolnimada hawl-gallada dakhli-ururinta iyo in fursad yar looga tago maareynta aadanaha. Xukuumaddu waxay horeba kombiyuutar-gelin ku sameysay rugaha hab-socodka qaarkood ee Muqdisho, Waaxda Dakhliga Berriga, waxay qorsheynaysaa in ay sii ballaariso arrintan iyadoo rakibaysa kombiyuutar-adeegsi, nidaam maamulka canshuurta oo lagu kalsoon yahay. Sidoo kale, Wasaaradda Maaliyadda waxaa ka go'an in ay sameyso nidaam maareyn dakhli-ururin sida nidaamyo kombiyuutar-adeegsi ee Xogta Dakhli-ururinta (ASYCUDA). Xukuumaddu waxay aqoonsan tahay wax-ku-oolnimada, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka faa'iidadooda ee casriyeynta adeegyada dawladda ("e-maamuleedka"). Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha waxay dhawaan suurta-gelisay in ay si khad toos ah (online) u

diiwaan-geliso ganacsiyada. Si loo daba-galo loogana hortago musuq-maasuqa, Xukuumaddu waxay ballaarinaysaa adeegsiga nidaamyada e-maamuleedka. Teknoolojigu wuxuu sidoo kale hagaajin karaa isla-xisaabtanka canshuurta iyo hawl-gallada dakhli-ururinta. Iyadoo la sameynayo warbixin barnaamij. Xukuumaddu waxay sameynaysaa dalabaadyo ah khad heegan ama khad toos ah oo ay muwaadiniintu ay waxay la kulmaan ku wargelin karaan hawl-wadeennada dawladda[17].

## 3.3. Fududayn Hab-raacyo

Xeerarka iyo hab-raacyada canshuurta Soomaaliya waa in la fududeeyaa lana mideeyaa intii suurta-gal ah. Hab-raacyo fudud in la bixiyo lana ururiyo canshuuraha waxay yareynayaan awoodda gaarka ah ee saraakiisha canshuurta, waxay kordhinayaan odorosidda, iyo sidoo kale waxay yareeyaan fursadaha ku aaddan kiro-raadinta. Xukuumaddu waxay qorsheynaysaa in ay casriyeyso qaab-hawleed sharci-dejin iyo maamul oo hoggaaminaya dakhliga berriga iyadoo la-tashi lala sameynayo u-qeybsaneyaasha dhiganka ah ee DXF iyo bulshada ganacsiga.

Iyadoo lagu kala soocay caddeyn aan ku filnayn ee hab-socodyada, qaabab iyo hab-raacyo aan caddeyn iyo nidaam canshuur oo dhacsan ee qiimeynta canshuuraha dakhli-ururinada, nidaamka dakhli-ururinada Soomaaliya wuxuu u bisil yahay dib-u-habayn. Macne-badnaanshahan ka jira dekedaha waxay guddoonsiinayaan saraakiisha dakhli-ururinta awoodo gaar ahaaneed ama dheeraad ah, oo u oggolaanaya in ay sameeyeen kala-sooc-xumo iyo “hoos-u-dhig qaan-sheegad” marka ay baarayaan rararka iyadoo la dhaafsanayo laaluush. Iyadoo la leh iskaashi dhaw Wasaaradaha Maaliyadda ee DXF, Wasaaradda Maaliyadda federaalka waxay sameynaysaa Qorshe Casriyeyn Dakhli-ururino (Customs Modernalization Plan) sida tub-raac ku aaddan is-bedel min mug-ku-saleynta ilaa qiimo-ku-saleynta canshuuraha dakhli-ururinta (from volume-based to value-based customs tariffs).

---

[17] Warbixinta barnaamijyada waxaa lagu balaariyey hoos ee faqradda “Dhaqamo: Abuuraya Bulsho diidaysa Musuq-maasuqa

### 3.3.1. Hagaajinta Waxbarashada Dadweynaha iyo Helitaanka Macluumaadka

Deganeyaal Soomaaliya oo aad u badan ayaa haba yaraatee aan ka war-hayn waajibaadkooda canshuur. Saraakiisha maamulka Dakhliga waxay ka faa'iidaystaan aqoon-la'aanta iyada ah, iyagoo oggolaysiinaya qaarkood in la marin-habaabiyo lana baado. Sidaas awgeed, fursadaha musuq-maasuq waxaa lagu sii yareyn karaa in la hagaajiyo aqoonta iyo baraarugsanaanta canshuur-bixiyeyaasha ee ku aaddan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda. Waxaa si gaar ah muhiim u ah in muwaadiniinta la baro canshuuraha ama khidmadaha laga rabo in ay bixiyaan. Xukuumaddu waxay fulinaysaa hawlo waxbarasho dadweyne iyo in ay abaabusho guddiyo heer-sare oo isu keena daneeyeyaal kala duwan si ku aaddan ku-talo-galkan. Xeerarka iyo hab-raacyada canshuur iyo dakhli-ururin waxaa laga dhigayaa kuwo si aad ah u sahlan loo heli karo iyadoo la sameynayo faafin walxo daabacan iyo sidoo kale qoraal leh khad toos ah (online publication). Ugu dambayn, Xukuumaddu waxay sameynaysaa Heshiiska Canshuur-bixiyeyaasha oo xeerinaya xuquuqda canshuur-bixiyeyaasha iyo mas'uuliyadaha saraakiisha canshuurta.

## 3.4. Baahinta Canshuur-dhaafitaanada

Xukuumaddu waxay raadinaysaa in ay yareyso abaal-marinta canshuur-dhaafitaanada, gaar ahaan qandaraasyada iyo gunnooyinka. Ku-shuqlanaanshahan waxaa lagu muujin karaan wax-ka-bedelka dhawaa ee lagu sameeyey *Hindise-sharciyeedka Maareynta Maaliyadda Dawladda* ee loo gudbiyey Baarlamaanka, kaasoo xakameynaya awoodda bixinta canshuur-dhaafyada oo keli u ah Wasaaradda Maaliyadda. Si dheeraad ah, si loo xaqiijiyo in meel-marinta sharciga canshuurta oo u midaysan sida ugu suurta-galsan iyo in la xaddido baxsadyada ururinta dakhliga, canshuur-dhaafitaanada ay Xukuumaddu siiso shakhsiyaadka iyo shirkadaha waxaa laga yeelayaa kuwo ay heli karaan dadweynaha.

## 3.5. Daacad iyo Mihnad Saraakiisha Canshuurta iyo Dakhli-ururinta

Wax-ku-oolnimo, waxtarnimo iyo kartida saraakiisha canshuurta iyo dakhli-ururinta oo ku shaqeynaya hal-beegyada mabaadi' ee ugu sarreeya ayaa leh firfircooni ee dhaqaajinta iyo maamulidda kheyraadka dhaqaale ee gudaha. Musuq-maasuq ay ku kacaan saraakiisha canshuurta iyo dakhli-ururinada ayaa lagu warbixiyey in ay caan ka tahay dhammaan Afrika iyo in ay u dhacdo qaabab kala duwan sida qalqaalo laaluush oo la dhaafsanayo "hoos-u-dhig canshuur", baad ku aaddan ka-faa'idaysi aqoon-yarida canshuur-bixiyeyaasha ee sicirada, iyo kaayashada dakhliga la soo ururiyey. Wasaaradda Maaliyadda

ee federaalka, oo ay wehliyaan u-qeybsaneyaasheeda dhigan ee gobol iyo maxali, waxay sameynaysaa xeerar asluub oo gooni ah ee saraakiisha maamulka dakhliga. Xeerarkani waa in ay ku jiraan xeerar ku aaddan laaluushka iyo musuq-maasuqa, iska-hor-imaadyada danta, dhawritaanka macluumaadka canshuurta, iyo hadiyadaha iyo qof-jeclaysi. Waxaa sidoo kale jira baahi ku aaddan hay'adnimo iyo mihnadnimo ballaaran ee maamulka dakhliga Soomaaliya. Saraakiisha canshuurta iyo dakhli-ururinada waa in ay ahaadaan kuwo si sahlan loo aqoonsan karo oo leh dhar u gaar ah iyo aqoonsiyo (IDs). Kartiyaha hay'adeed iyo farsameed waa in sidoo kale la xoojiyaa iyadoo loo tababarayo maamuleyaasha xeerarka gudaha iyo hal-beegyada caalamiga ah ee ku aaddan ururinta dakhliga.

## 3.6. Xoojinta Aaminaadda Gadashada iyo Abaal-marinada Dawladda

Gadashada dawladda waxay noqon kartaa mid si gaar ah ugu nugul musuq-maasuqa sabab la xiriirta adkaanshaheeda, cabbirka bixitaanada maaliyeed ee ay ku kacayso, lacag-bixinta dhaw ee u dhexaysa dawladda iyo qeybaha gaarka loo leeyahay. Taariikh ahaan, abaal-marinta qandaraasyada dawladda ee Soomaaliya kuna saleysna tartan furan, shidaal-siinta tuhumo musuq-maasuq iyo eex dhanka xulashada qandaraasleyaasha. Si kastaba, dhawrkii sano oo la soo dhaafay, waxaa jiray ku-shuqlanaansho siyaasadeed oo heer-sare ah ee dib-u-habaynta gadashada laga bilaabo jidka loo maray *Xeerka Gadashada ee 2016.* Si kastaba, maqnaanshaha Hay'adda Gadashada, sharcigu waa mid leh adeegsi xaddidan. Natiijo ahaan, Guddi-hoosaadka Dhaqaalaha ee Golaha Wasiirrada wuxuu dhisay Guddi Ku-meel-gaar ah ee Gadashada Qaranka (INPB) isagoo meel-mariyey shuruudaha gadashada ku-meel-gaarka ah si uu u hago gadashada dawladda inta *Xeerka Gadashada* uu si buuxda u hirgelayo. Si waafaqsan ku shuqlanaanshihiisa ku aaddan daah-furnaanta iyo qandaraas-bixin loo tartamayo, XJFS waxay wadaa in ay dib-u-eegto qiimo sare, qandaraas-hoosaadyada iyo abaal-marinada ay galeen maamuladii hore. Xukuumaddu waxay wadaysaa in ay ilaaliso danta dawladda iyo dib-ula-xaajood ama baabi'iso qandaraasyadan haddii ay habboon tahay.

## 3.7. Hagaajinta Fulinta iyo Kartida Gadashada

Kartida gadashada iyo fahmidda gadashada ee hab-socodka loo baahan yahay wuxuu reebayaa xaddidnaan saameysa gebi ahaan Xukuumadda. In kastoo Wasaaradda Maaliyadda ay ku faafisay shuruudaha gadashada ku-meel-gaarka ah dhammaan hay'adaha wax kharash-gareeya, in badan ayaa ku sii jira deeq qandaraasyo qiimo-sare leh iyo abaal-marino il-keliya ku saleysan iyadoo aysan daba-joogin hab-raacyo la aqoonsan yahay ama kor-joogteyn. Guddiga Ku-meel-

gaarka ah ee Gadashada Dawladda (GKGD). *Xeerka Gadashada* nafsadiisu wuxuu u oggolaanayaa wasaaradaha in ay helaan qandaraasyo leh qiimo kasta iyo in ay adeegsadaan qaabab qiimo-sheeg oo hal-beeg-la'aan ah sida il-keli ahaaneed iyadoo aysan jirin ansixin cid saddexaad. Si loo bogsiiyo tan, Wasaaradda Maaliyadda waxay soo jeedisay wax-ka-bedello ku aaddan *Xeerka Gadashada* si loo awood-siiyo ansixin dhexe ee qandaraasyo qiimo-sare iyo qaabab qiimo-sheeg oo hal-beeg-la'aan ah. Si muhimad leh, Faraca Gadashada ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Faracyada Gadashada ee Wasaaradaha waxay dhaqso ugu baahan yihiin gacan-siinta karti-dhisidda si ay u gaaraan himmillooyinka loo idmaday.

## 3.8. Xakameynta Kharashka Badan

Xukuumaddu waxay si guul ah u dhistay dib-u-habayn muhiim ah ee dhanka xakameynta kharashka. *Hindise-sharciyeedka Maareynta Maaliyadda Dawladda* oo loo gudbiyey Baarlamaanka Federaalka wuxuu si durugsan ugu oggolaanayaa xukuumadda adeegsiga xakameyn ballaaran ee ku aaddan kharashyadeeda iyo in la hagaajiyo gebi ahaan daah-furnaanshaha.

Taariikh ahaan, kharashaadka dawladda waxaa lagu bixin jiray idil ahaan caddaan, oo abuuraya hawl mug leh oo ku aaddan leexsiga dhaqaalaha dadweynaha. Gacan-ku-haynta lacagta caddaanka ah ayaa dibadeed si xawli ah u yaraaday iyadoo kharashaadka sida mushaarooyinka lagu bixiyey si toos ah xisaabaadka bankiga ee shakhsiyaadka iyo kharashaadka aan mushaarka ahayn oo toos loo siiyo qandaraasleyaasha. Dhanka amniga xog-sireed diiwaan oo lagu sameeyey dhammaan shaqaalaha Ciidanka iyo in si toos ah lagu bixiyo dhammaan mushaarooyinka iyo gunnooyinka xisaabadka bankiga ee shakhsiyaadka ayaa ah wax socda. Xukuumaddu waxay qorsheynaysaa in ay dhisto Farac Baaris oo ka tirsan Xafiiska Xisaabiyaha Guud si loo xaqiijiyo sii-daynta badeecadaha iyo adeeg ka hor bixinta qaan-sheegadyada, gaar ahaan qandaraasyada cuntooyinka qiimaha sare leh.

## 3.9. Hagaajinta Daah-furnaanshaha Miisaaniyadda

XJFS waxay aqoonsan tahay in daah-furnaanshaha dhaqaale uu muhiim u yahay si looga hor-tago leexsashada iyo xatooyada hantida iyo kheyraadka dadweynaha. Wasaaradda Maaliyadda waxay dhawaan qaaday tiro tallaabooyin ah oo dhiirri-gelin leh si loo hagaajiyo daah-furnaanshaha dhaqaale iyadoo dadweynaha si buuxda loogu soo bandhigi doono macluumaadka ku aaddan sida Xukuumaddu u hesho, u kharash-gareyso iyo sida ay u maareyso kheyraadka dadweynaha sanad kasta oo laga heli doono bogeeda internet-ka (website) iyo baahinta *Hagidda Muwaadiniinta ee Miisaaniyadda 2018* oo ay wehliso ujeeddada waxbaridda dadweynaha ee miisaaniyadda. Muddada dheer, Wasaaradda waxaa ka go'an dejinta asaaska in ay gaarto Xeerka Daah-furnaanshaha Dhaqaale ee Hay'adda Lacagta Aduunka (IMF).

## 3.10. Soo-celinta iyo Maareynta Hantida Dawladda

Adeegsi-xumidda dhulka iyo hantida dawladda oo looga faa'iidaysto shakhsi ahaan ayaa ka noqday dhaqan caan-baxay Soomaaliya tan iyo markii ay dawladdu duntay 1991 iyo ankee ka horeba. Sanadkii 2015, Bankiga Dhexe ee Soomaaliya (BDHS) wuxuu abuuray Kooxda Dib-u-soo-celinta Hantida Qaranka si ay u aqoonsadaan una soo celiyaan dhammaan hantiyada qaranka, ha ahaato lacag ama dhismo. Bankiga Aduunka – Xafiiska Qaramada Midoobay ee Maan-dooriyeyaasha iyo Dembiyada ee Qorsheynta Soo-celinta Hantida la Xaday (StAR) waxay kula taliyeen BDHS dadaaladiisa ku aaddan soo-celinta hantida. Xukuumaddu waxay sii wadaysaa adeegsiga taageeradan caalamiga ah iyo in ay iskaashi la yeelato dalalka kale si ay u soo celiso hantiyaha qaranka ee dibadda.

Bishii Janaayo 2019, Xukuumaddu waxay shaacisay magacaabidda guddi ka kooban 11 xubnood oo u xilsaaran dhawridda iyo soo-celinta dhulalka iyo hantiyaha dawladda. Hawsha kowaad ee guddigu waxay noqonaysaa in uu dhammeystiro tiro-koobka dhammaan dhulalka iyo hantiyaha dawladda.

# 4. MAAMUL: Dhisidda Shaqaale Rayid ah oo leh Mudnaan-ku-saleyn, Mihnad, Loona Dhan Yahay

*"Qofka saxa ah ha loo dhiibo jagada saxda ah!"*

*Waxaa si joogto ah ugu dhawaaqay Mudane Ra'iisul Wasaare Cabdirisaaq Xaaji Xuseen, Muddadiisii Xil-haynta 1964-1967 Xilli lagu gudo-jiray Dib-u-habayno Ballaaran ee Qeybta Dawliga ah.*

Dib-u-habayn shaqaalaha rayidka waa aaladda siyaasadeed ee muhiimka ah si loo xakameeyo musuq-maasuqa ka jira dalal badan oo soo-koraya. Shaqaalaha rayidka ah ee Soomaaliyeed, caddeyn dabeecada qof-jeclaysiga iyo maqnaanshaha daah-furnaan iyo isla-xisaabtan, oo ay sii kordhiyeen wax-ku-ool-xumidda hay'adeed, waxqabad-xumo iyo niyad-hoosayn ka dhex jirta shaqaalaha ayaa ah tilmaameyaal ku filan in hawsha lagu talo-galay ay tahay meel-mar.

Iyadoo la qorsheynayo dib-u-habayno shaqaalaha rayidka ah oo waxtar leh waa hawl isku-dhafan oo mug leh, Hanti-dhawrka Kheyraadka Shaqaalaha Rayidka Hawl-wadeennada/Aadanaha ee 2018 oo ay fulisay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada wuxuu matalayaa isku-dayga kowaad in la helo sawir muuqda ee qeybta dawliga ah ee qaranka Soomaaliya. Baahida degdega ah ee hawshaas waxay noqonaysaa wax qayaxan marka ciddi tixgeliso in miisaaniyadda qaranka ee 2018 dhinac la iska dhigo US$130.4 milyan ee mag-dhawga shaqaalaha dawladda oo ka sarreysa US$128 milyan 2017 iyo in ka badan labanlaab (US$52.9) ee 2015. Tan waxay lid ku tahay US$274 milyan misaaniyad, oo macnaheedu yahay in nus kamid ah miisaaniyadda qaranka loo qoondeeyey mushaarooyinka shaqaalaha rayidka ah.

Wax-ka-bedelid *Sharciga Shaqaalaha Rayidka* ayaa hadda horyaal Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Si ku aaddan dhismaha la filayo ee qaab-hawleedka sharci-dejin iyo siyaasad oo mug leh, Xukuumaddu waxay odorosaysaa shaqaale rayid ah oo si ballaaran ugu xeer-nidaamsan xeerar iyo hab-raacyo oo aan ku iman awood shakhsiyadeed oo dheeraad ah. Haddii shaqaale rayid ah la rabo in uu noqdo mid ah wax-ku-ool, karti leh, loona dhan yahay, dib-u-habayn ayaa loo baahan yahay ee tallaabo kasta oo ku aaddan wareega maareynta kheyraadka aadanaha, taasoo ah: shaqo-qorista, dalac-siinta, maareynta waxqabad, shaqo-ka-eryid, mushaar-siin, horumarinta shaqo, iyo hufnaanta maareyn.

IQLM waxay diirrada saareysaa meelaha hor-tebyada leh ee soo socda:

## 4.1. Soo-nooleyn Dhaqanka Shaqaalaha Dawladda

Waxaa jira shaqo-ka-maqnaansho aad u sareeya, fadhiidnimo iyo qanaaco-darro haysata shaqaalaha rayidka ah ee Soomaaliya. Marka la eego xaalada ay ku sugan yihiin in badan oo kamid ah shaqaalaha qeybta dawliga ah ee Soomaaliya shaqo waxaa loo tixgeliyo, xaaladan ma lahan la yaab. U shaqeynta dawladda waxay noqon kartaa dadaal khatar leh, ma ahan wax aan caadi ahayn in shaqaalaha rayidka ay noqdaan bar-tilmaameed iyo in keli ahaan loo weeraro sabab la xiriirta in mansabkooda ku aaddan in ay yihiin shaqaale rayid ah. Sidaas awgeed, bedelka dhaqanka nidaameed iyo af-hayeenimada ku saabsan shaqaalaha dawladda waa ballan-qaaditaanka istiraatijiyadda la-dagaallanka musuq-maasuqa. Heer kasta oo dawladda, shaqaalaha dawladda dib loogu suntaa in ay leeyihiin meherad sharaf leh. Haddii shaqaalaha rayidka ah la mataanoobaan shaqadood si ku aaddan adeeg iyo geesinimo, waxay dareemi doonaan dhiirranaansho badan iyo maal-gelin ay ka helaan shaqooyinkooda iyo yaraansho in ay noqdaan kuwo ku shuqlan dabeecad mabda'-la'aaneed sida musuq-maasuqa.  Lama-huraan ahaan, iyadoo loo marayo waxbarasho iyo tababar dadweyne, shaqaalaha rayidka ah iyo shacabka si siman waa in loo dareesiiyaa in ay milicsadaan shaqada dawladda si ku aaddan fursad adeeg balse aan lahayn wax-dheef shakhsiyeed maadaama caadifad lidkeeda ah ay ka hana-qaadayso gebi ahaan Soomaaliya.

## 4.2. Hawl-qabadyo leh Qayaxnaan iyo Ujeeddo Shaqo-qoris, Horumar iyo Shaqo ka-eryid

Shaqaalaha aan aqoonta lahayn oo ku-qaameysan jagooyinkooda ee xagga taageerada siyaasadeed iyo qabiil waxay sababaan caqabad, si loo gaaro shaqaale rayid ah oo leh mihnad iyo isla-xisaabtan ee Soomaaliya. Adeejinta dhaqanka waa in dib loogu jiheeyaa si loo dhiirri-geliyo adeejinta ku saleysan shuruudo ujeeddo leh, sida karti iyo waayo-arragnimo oo aan ahayn asbaabo la xiriira xigto qabiil ama shakhsi ahaan iyo xiriiro ganacsi.  Hab-raacyo shaqo-qoris, horumar iyo shaqo-ka-eryid waa in ay noqdaan kuwo si qayaxan loogu dhawro sharci iyo siyaasad.

Hab-socod xulasho oo leh tartamid, mudnaan-ku-saleys ayaa ah hor-tebyo sare. Waa in ay jirtaa is-dul-fuul weyn oo u dhexeeya taariikhda waxbarasho iyo xirfadaha ee shaqaalaha iyo jagooyinkooda. Si loo helo daah-furnaanta ugu ballaaran ee suurta-galka ah, shaqooyinka waa in si shaacsan loo xayeysiiyaa iyo in tartameyaasha si nidaamsan loo qiimeeyo si leh imtixaano qoraal iyo afba. Si kastaba, dejinta xayeysiinta shaqoojinka, waxaa muhiim ah in mas'uuliyadaha

shaqada oo qayaxan, waajibaadka shaqo ee la filayo, iyo qaab-dhismeedyada nidaameed oo si cad u qeexan ayaa la sameynayaa. Waxaa intaas wehliya, la'aanshaha hab-socodyo cad oo qeexan oo hawl-gal ah si loo miisaamo waxqabadka, fursado xaq ah ee ku aaddan horumarka shaqo waxay noqonayaan dhalanteed. Dhismaha nidaamyo maareyn waxqabad ayaa ka dhigaya iyada sahal in banaanka loo saaro kuwa waxqabadkoodu liito iyo in la aqoonsado kuwa leh waxqabadka sarreeya. Dib-u-qaabayn, Guddiga Madaxa-bannaan ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda ayaa kaalin muhiim ah iyo kaalin midaysan ka qaadanaya fulinta hawlaha sare ku tilmaaman.

## 4.3. Ciqaabidda Dabeecadda Mabda'-la'aaneed

Ciqaabidda dabeecada mabda'-la'aaneed waxay noqon kartaa ka-hortagid awood leh si loola tacaalo musuq-maasuqa. Haddii shaqaalaha dawladdu ay filayaan in ay gelayaan la-xisaabtan iyo in ay wajahayaan cuna-qabateyn (sida ganaax lacageed ama shaqo-ka-eryid), aad bay u yaraanaysaa in ay galaan falal musuq-maasuq. Tallaabooyin anshax-marineed oo quman waa in la meel-mariyo. Si kastaba, Iyadoo aan marka hore la qaban musuq-maaasuqa, faa'iidada ku aaddan in la dejiyo nidaamyo ee raad-reebyo waa wax kooban. Sidaas awgeed, awoodaha kormeerid ee ka jira shaqaalaha rayidka ah waa in la horumariyaa iyadoo ay wehliyaan arrarada ciqaabaha. Tallaabooyinka sida hanti-dhawro leh dhammeystir iyo madax-bannaani, kombiyuutar-u-adeegsi hab-socodyada dawladda iyo keydin diiwaan-gelin oo hagaagsan ayaa gacan ka geysan kara in la dabo-galo dabeecada musuq-maasuqa.

## 4.4. Abaal-marinta Hufnaanta kan sameeya

Tallaabooyin ciqaabeed ee lagu anshax-marinayo qofka musuq-maasuq sameeya waa in ay dheelli-tirtaa bixinta abaal-marrinno la siinayo ama dhiirri-gelinno qofka hufnaanta sameeya si loo muujiyo wanaagga hufnaanta. Halka Xukuumaddu ay lahaan karto awood kooban in ay siiso gunnooyin lacageed kuwa leh dabeecada wanaagsan, shaqaalaha muujiya hufnaanta waxaa lagu abaal-marin karaa qaabab kale. Tusaale ahaan, hay'aduhu waxay qabanqaabin karaan xaflado ansixin iyo bixin shahaado-sharafyo oo la siiyo kuwa la yimaada waxqabad xoog leh ee hufnaan iyo dhiifoonaan.

## 4.5. Mag-dhaw Quman oo Waqtiyeysan

IQLM waxay indhaha ku haysaa xaqiiqooyinka dhaqaale-bulsheed ee culeyska leh ee Soomaaliya iyo iyadoo aqoonsan in ay adag tahay in laga baaqsado ku-shuqlanaanta musuq-maasuqa haddii shaqaalaha mushaarkooda aad u hooseeya ama si aan joogto ahayn loo mushaar siiyo oo aysan awoodin in ay ku noolaadaan dakhliga shaqaalaha daacada ah. Dhab ahaan, waxaa jira caddeyn taageeraysa

dooda in musuq-maasuqa uu soo if-baxo marka mushaarooyinka ay ka hooseeyaan mushaarka salka ah ee lagu noolaan karo. Sidaas awgeed, waxaa lama-huraan in mushaarooyinka shaqaalaha rayidka ah ahaadaan, ugu yaraan, kuwa u dhigma mas'uuliyadahooda. Xukuumaddu waxay aqoonsan tahay in nidaam darajo mushaar-siin oo leh qeexnaansho qayaxan iyo barnaamijyo dakhli ay yihiin muhiim in la soo jiito lana hayo shaqaalaha waxtar ah iyadoo la siinayo gunnooyinka ay uga maarmaan musuq-maasuqa.

## 4.6. Horumarinta Meherada

Wax-ku-ool-xumidda hay'adeed ee qeybta dawliga ah waa sifo sheeko-sheeg musuq-maasuqa. Isugeyn asbaabo awgood, mag-dhaw ahaan magacaabitaanada qof-jeclaysi, fursadaha tababar oo liita, shahaadooyinka been-abuurka ah, iyo kala-duwanaansho u dhexeeya jagooyinka iyo asalka waxbarasho ama mihnadeed, shaqaalaha rayidka ah ee Soomaaliya wuxuu wajahayaa dib-u-dhacyo awood oo darran. Xukuumaddu waxay ka dheregsan tahay fadhiid iyo awood-siin-la'aan shaqaale oo leh awood aan la adeegsan. Dhisidda shaqaale rayid ah oo leh mihnad iyo karti oo la saan-qaadi kara is-bedelada wasiirrada iyo maamulada waa muhiim. Si kastaba, ka-koridda dhaqanka noolaanshaha iyo rajooyinka shaqada muddo gaaban waxay u baahan yihiin aaminaad in uu jiri doono muddo dhexe ama muddo dheer ee dhabe meheradeed. Sidaas awgeed, horumarinta heerarka mihnadeed ee shaqaalaha dawladda oo ku aaddan horumarinta meheradeed iyo in la siiyo fursado xaq ah ee tababar ayaa la siin doonaa hor-tebyo taabo-gal ah. Si tan loo gaaro, Xukuumaddu waxay dejinaysaa asaaska in la dhiso machad tababarka shaqaalaha rayidka.

# 5. HAB-DHAQAN: Abuuridda Dhaqan Diidaya Musuq-maasuq

*"Musuq-maasuqa waa Soomaali Meheradeedii"*

**Tuduc yar oo laga soo qaatay gabay uu tiriyey qiyaastii 1900kii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, Hoggaamiyihii Halgankii Gumeysi-la-dirirka ee Daraawiishta.**

Kiro-raadin, tixgelin-la'aan sarreynta sharciga, iyo daacadnimada qabiilka si ka sarreysa Qaranka ayaa isugu tegay in ay si tartiib ah u nabaad-guuriyaan qiyamyada guud ee Soomaaliya. Hadda la joogo, waxay u muuqataa in waxqabadyo musuq-maasuq oo badan ay socdaan oo loola dhaqmayo sidii dabeecad la oggol yahay. Waxaa la filayaa in go'aan-gaaristu u dhuun-daloosho kooxo gaar ah, in shaqaalaha dawladdu u diyaarsan yihiin laaluushyo, iyo in shaqaalaha rayidka ku dhaqmo qof-jeclaysi. Musuq-maasuq looma xakameyn karo si nidaamsan haddii aan filashooyinkan aan la wiiqin isla markaana aan musuq-maasuq dib loogu qeexin in uu yahay lama-oggolaadaan, asluub-dembiyeed.

IQLM waxay diirradda saareysaa meelaha hor-tebyo ee soo socda:

## 5.1. Hagaajinta Waxbarashada iyo Baraaruga Dadweynaha

Dad aad u badan ee Soomaaliya ayaa haba yaraatee aan u war-hayn waxa uu yahay musuq-maasuq. Iyadoo ay cadahay baahsanaanshihiisa dalka, waxaa muhiim ah in dhammaan qeybaha bulshada, oo ay ku jiraan hoggaamiyeyaasha dawladda, xubnaha goleyaasha Baarlamaanka, hoggaamiyeyaasha diinta, shaqaalaha dawladda, hay'adaha waxbarasho, iyo dadweynaha guud laga dhigo kuwo ka war-haya waxqabadyada musuq-maasuqa, raad-reebkooda, iyo sida loo wajahayo iyagaas.

## 5.2. Shaqaalaha Dawladda

Qeybaha *Hay'adaha iyo Maamulka* labaduba ee IQLM, tababar mabaadi' iyo hufnaan oo la siiyo shaqaalaha dawladda ayaa ah arrin waxtar leh. Qiyamyada mabaadi' iyo hal-beegyo ayaa u baahan in si mug leh looga hawl-geliyo adeegga dadweyne laga bilaabo hoggaanka sare. Hawl-wadeennada ka hoos shaqeeya Ra'iisul Wasaaraha, falanqeynta musuq-maasuq waxaa la siiyey hor-tebyo mug leh xilligii dhawaan Golaha Fulintu ku gudo-jiray 2-maalmood ee dib-ugu-noqoshada (Cabinet Retreat). Xukuumaddu waxay wadaysaa in ay hor-tebyeyso

ajendaha la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo IQLM (NACS) oo leh guddiyo heer-sare. Saraakiil leh heerar wasiir iyo agaasin ayaa la dareensiinayaa baahida in la soo bandhigo hufnaanta ugu sarreysa ee suurta-galka ah, daah-furnaansho iyo isla-xisaabtan, iyo iyadoo loo baahnaanayo in la sameeyo hawl-qabadyo qaab heshiisyo hufnaan. Sidoo kale, tababarka ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa, hufnaanta iyo adeegga dadweynaha waxaa loo qabanayaa dhammaan herarka kala duwan ee shaqaalaha.

## 5.3. Dadweynaha Guud

Soomaaliya waxay leedahay caqiido islaam oo ay hodan ka tahay in ay si wanaagsan looga dhawrsanaado xatooyo iyo lunsashada hantida cid kale leedahay. Waxaa intaas wehliya wacdiyo diimeed, Xukuumaddu waxay adeeganaysaa khudbado saraakiisha dawladda, Idaacadaha saxaafadda iyo raadiyaha, iyo manaahijta dugsiyada iyo jaamacadaha in wax la baro oo la kiciyo dadweynaha si loo xoojiyo mas'uuliyadaha dadweynaha iyo in la sameeyo is-bedel dhaqan-bulsheed oo ka dhigaya musuq-maasuqa in aan loo dul-qaadan karin balse la cambaareeyo. Waxaa kale oo jira baahi waxbarasho dadweynaha guud oo leh aragti lagu dareensiinayo dadweynaha kaalimaha dastuuriga ah iyo xilalka dawladeed, garsoorka, hoggaamiyeyaasha siyaasadeed iyo booliska, iyo muhimadda hufnaanta ee xafiisyadan. Si looga gun-gaaro arrimahan iyo in lagu hayo la-xisaabtan, Xukuumaddu waxay awood-siin iyo la-shaqeyn la yeelanaysaa bulshada rayidka ah iyo qeybta gaarka loo leeyahay (private sector) si ku aaddan iskaashi barnaamij-dejinta la-dagaallanka musuq-maasuqa oo ay kamid yihiin balse aan ku koobnayn horumarinta aflaanta waxbarasho iyo fariin-gudbinta raadiyaha iyo sahannada musuq-maasuqa.

## 5.4. Bixinta Adeeg ay u siman yihiin Muwaadiniitu

Heshiisyada Adeegga Muwaadiniinta waxay horumarinayaan bixinta adeegga dadweynaha, hagaajinayaanna nidaam waxtarnimo leh, iyo sidoo kale waxay yareynayaan fursadaha musuq-maasuqa iyagoo dhanka kale kordhinaya dakhliga dawladda ka soo xarooday adeegyada dadweynaha, dabeecada mabda'-la'aaneed ee ka jirta adeegga dadweynaha waxaa dhiiri-geliya xaqiiqada ah in dadweynaha si yar loo hago ama la siiyo macluumaad ku saabsan adeegyada uu ugu talo-galay Qaranka ama heerka adeeg ee ku aaddan adeegyada ay kamid yihiin waqtiyeynta waqtiga iyo khidmadaha. Arrintan aqoon-la'aaneed waxaa ka faa'iideystay qaar kamid ah shaqaalaha adeegga dadweynaha si ay u dhiig-miirtaan muwaadiniinta. Sidaas darteed, xafiis kasta oo dadweyne waxaa looga baahan yahay inuu qoro isla markaasna baahiyo Hashiisyada Adeegga Muwaadiniinta si loogu wargelinayo dadwynaha arrimaha ku aaddan adeegyada iyo hal-beegyada ay filan karaan. Hashiiyadani waxay ka kooban yihiin soo-

bandhig ay sameynayaan shaqaalaha dawladda oo ay tahay inay saxiixaan ayna fahmaan. Xafiisyada dawladda ee bixiya adeegyada qiimaha, dhammaan khidmadaha iyo canshuuraha waa in si baahsan loo faafiyaa.

## 5.5. Caadiyeynta La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Heerka Hay'adeed

Halkii jawaab-celin dhaqso ah laga siin lahaa musuq-maasuqa, waxaa muhiim ah in ka-hortaga musuq-maasuqa la caadiyeeyo gebi ahaan hay'adaha dawladda ee Soomaaliya. Laga bilaabo darajoojinka u sarreeya ilaa kuwa u hooseeya ee wasaaradaha, waaxyaha iyo wakaaladaha, ka-hortaga musuq-maasuqa waa in uu ahaadaa mid si dhab ah looga caadiyeeyo hay'ad kasta iyadoo dhisanaysa qorshaha hawsha la-dagaallanka musuq-maasuqa ee iyada u gaarka ah.

## 5.6. Dhisidda Qaababka Looga Warbixiyo Musuq-maasuqa

Si loo dabo-galo oo si dhab ah loo wajaho musuq-maasuqa, waxaa lama-huraan ah in la abuuro barnaamijyo ku aaddan sidii shakhsiyaadka uga warbixin lahaayeen eedaymaha ama waayo-arragnimadooda musuq-maasuqa. Xukuumaddu waxay hor-tebyeynaysaa horumarinta hawlaha cabashooyinka dadweynaha oo leh helitaan, wax-ku-oolnimo iyo aaminaad oo u suurta-gelinaya cabashooyinka in loo gudbiyo si waafaqsan qeybta, tusaale musuq-maasuqa uu galo sarkaal canshuur, uu galo boolis, ama uu galo garsoore, iwm.

## 5.7. Dhisidda Qaababka Loo Cabbiro Musuq-maasuqa

Mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn in la wajaho musuq-maasuqa Soomaaliya waa xog-yari ku aaddan xaalada gaar ahaaneed, baaxadda iyo goobaha musuq-maasuqa oo hagi kara qaabin siyaasadeed oo macno leh iyo dhaqan-gelin. Agaasinka Istaatiskada Qaranka ee Wasaaradda Qorsheynta ayaa qabanaya hoggaanka ku aaddan dhisidda qaababka in la ururiyo, la keydiyo iyo in la faafiyo macluumaadka khuseeya baaxadda iyo kala-duwaanshaha musuq-maasuqa ee gebi ahaan Soomaaliya. Nuglaanshaha qeyb gaar ahaaneed ee Qiimeynaha Musuq-maasuq (VCAs) waxay u baahan yihiin in sidoo kale lagu qabto laanta fulinta (iyadoo ay wehliso diirrad-saarid gaar ahaaneed ee wasaaradaha ugu kharash-gelidda sarreeya) ee dawladda gudaheeda, iyo garsoorka gudihiisa.

## 5.8. GEBANGABO

Ku-baraarugii qaran-la'aan, Soomaaliya waxay ku sii socotay in ay la loolanto dhaxalkii hay'adaha curdanka ah, meel-marin liidata ee xagga sharciga iyo maamulka cadaaladda, saboolnimo aan harayn iyo sinnaan-la'aan, guddoon bulsho ee musuq-maasuq oo ballaaran. Xaaladahani waxay si shaki-la'aan ah u

abuureen jawi in laaluushyada lagu gelayo musuq-maasuqa ay noqdaan ama loo arko muhiim.

Si loo xakameeyo musuq-maasuqa, laaluushyadan waa in la yareeyaa. IQLM waxay odorosaysaa gaaritaanka arrintan iyadoo loo marayo: (i) go'aan siyaasadeed oo leh joogteyn iyo xalaal iyo ka-qeyb-qaadashada dhammaan heerarka dawladda; (ii) hay'ado si habboon u shaqeynaya- hay'adda sare ee hanti-dhawrka, booliska iyo maxkamadaha – in la joojiyo wareega dembi-qabad-la'aan (impunity); (iii) nidaamyo maareyn ee maaliyadda dawladda oo adag oo xaqiijiya daah-furnaan iyo isla-xisaabtan ku aaddan bixitaanada maaliyadda dawladeed; (iv) ku-abaal-marinta karti ee shaqaalaha rayidka oo lagu kala-sooco dhaqanka adeegga hay'adeed, hufnaanta, iyo waxtarka; iyo (v) is-bedel afkaarta bulsho-dhaqameed ee ku aaddan musuq-maasuqa ee loo marayo hannaan 'idil ahaan dawladda iyo bulshada'.

Heerka baraarugnaanshaha Soomaaliya oo ah dal nugul, IQLM waxay doonaysay si leh miisaan caqliyeysan oo lagu bartil-maameedsado inta u dhexaysa tallaabooyin ka-hortag oo looga gol leeyahay hawlo hoos loogu dhigayo musuq-maasuqa iyo tallaabooyin anshax-marineed oo kordhinaya wax-ka-qabadyada ku aaddan musuq-maasuqa.

**"Allow nagu hagaaji tubta toosan"**

**[Suuratul Faatixa 1:6]**

# FAL-QORSHEEDKA: XAQIIJIN HIRGELIN WAX-KU-OOL AH

| | HAWL | HAY'ADDA U XILSAARAN | MUDDO |
|---|---|---|---|
| **1**<br><br>**HOGGAAMIN: Isku-xiridda go'aanka Siyaasadeed iyo Isla-xisaabtanka** | Xoojin wada-hadal qaran ee la-dagaallanka musuq-maasuqa: ballaarin ku-hawlanaanshooyinka dawladda ee saraakiisha sare– gaar ahaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Hanti-dhawraha Guud, Xeer-ilaaliyaha Guud, Wasiirka Cadaaladda iyo Wasiirka Maaliyadda– in ay falanqeeyaan horumarka laga gaaray dagaalka musuq-maasuqa ee warbaahinta qaranka. | Xafiiska Madaxweynaha/Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha; Wasaaradda Cadaaladda | Waa socdaa |
| | Sameyn maamul caddeyn hanti oo leh hab-raacyo qiraal iyo ansixin. | Wasaaradda Cadaaladda | Xilli gaaban |
| | Diyaarin hawsha asaasiga ah ee si guud, 'hal qof–hal cod' ee doorashooyinka sanadka 2020. | Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka | Xilli gaaban |
| | Hawl-gelin Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa. | Wasaaradda Cadaaladda | Xilli gaaban |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Hirgelin *Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa* iyo *Heshiiska Midowga Afrika ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa* | Wasaaradda Cadaaladda | Dhaqso |
| | Sameyn qaab-hawleed sharci-dejineed iyo dhisid Xafiiska Gardoonka. | Wasaaradda Cadaaladda | Xilli dheer |
| | Dhisid dadaalo la-dagaanka musuq-maasuqa ee heerarka DXF/degmo, oo ay ku jiraan Hay'adda Dawlad-wanaagga iyo La-dagaallanka Musuq-maasuqa Puntland; sameyn istiraatijiyado la-dagaallanka musuq-maasuqa ee Dawlad-goboleed kasta. | Wasaaradda Cadaaladda | Xilli dheer |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **3** **MAALIYAD DAWLAD: 'Dabo-gal Lacagta' iyo Ilaalinta Guulaha Dadweynaha.** | Kombiyuutar-u-adeegsiga hab-socodyada maamulka dakhliga oo ku rakiban nidaam maamul canshuur kombiyuutareysan, lehna hufnaan. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli dheer |
| | Dhisid nidaam maareyn dakhli-ururinada oo leh farsamada casriga ah. | Wasaaradda Dekedaha; Wasaaradda Maaliyadda | Xilli dheer |
| | Castiyeyn iyo fududayn qaab-hawleed sharci-dejin iyo maamul ee dakhliga canshuurta berriga. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli dheer |
| | Sameyn Qorshe Casriyeyn Dakhli-ururinada oo ay kamid yihiin tub-raaca kala-guuritaanka min mug-ku-saleys ilaa qiimo-ku-saleys ee tariifooyinka dakhli-ururinada. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli dheer |
| | Fulin waxbarasho dadweyne ee canshuuraha ee dhanka Telefishanka (TV) iyo isgaarsiinada raadiyaha iyo kullamo canshuur oo heer sare ah. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli gaaban |
| | Hagaajin helitaanka sicirka canshuurta iyo dakhli-ururinada iyo hab-raacyada oo loo marayo faafin qoraallo daabacan iyo faafin toos loo heli karo. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli gaaban |
| | Sameyn Heshiis Canshuur-bixiyeyaal oo sharaxaya xuquuqda canshuur-bixiyeyaasha iyo mas'uuliyadaha saraakiisha canshuurta. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli gaaban |
| | Faafin macluumaadka canshuur-dhaafyada ee la siiyo shakhsiyaadka iyo shirkadaha. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli gaaban |
| | Sameyn iyo hirgelin xeerarka anshaxa oo dhammeystiran oo la siinayo saraakiisha maamulka dakhliga. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli gaaban |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Mihnadayn saraakiisha maamulka dakhliga oo looga baahan yahay Lebis u gaar ah iyo Aqoonsi Dokumenti (AD) iyo in la siiyo gacan-siin karti-dhisid si loo hagaajiyo kartiyada farsameed. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli dheer |
| | Qabasho kullamo tababar si loo xaqiijiyo in dhammaan HWW ay fahamsan yihiin oo ay hirgeliyaan GKSQ shuruudaha soo-gadashada. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli gaaban |
| | Hagaajin kartida soo-gadashada ee Faraca Soo-gadashada ee Wasaaradda Maaliyadda iyo sidoo kale faracyada HWW oo loo marayo tababar iyo karti-dhisid. | Wasaaradda Maaliyadda | Xilli dheer |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Dhisid Farac Baaritaan oo ka tirsan Xafiiska Xisaabiyaha Guud si uu u xaqiijiyo bixinta badeecadaha iyo adeegyada ka hor bixinta qaan-sheegadyada. | Xafiiska Xisaabiyaha Guud/Wasaaradda Maaliyadda | Xilli dheer |
| | Ururinta tiro-koob buuxa ee dhulalka iyo hantida dawladda. | Guddiga Ilaalinta iyo Dib-u-soo-celinta Hantida Dawladda. | Xilli dheer |
| | Dib-u-eegis dhammaan kireynta hantida dawladda iyo tuuritaanada tan iyo 2012. | Guddiga Ilaalinta iyo Dib-u-soo-celinta Hantida Dawladda. | Xilli dheer |
| **4** **MAAMUL**: **Dhisidda Shaqaale Rayid ah oo Ku-saleysan** | Fulinta hawlo dareen-siin iyo barnaamijyo tababar la siinayo dhammaan shaqaalaha qeybta dawliga ah ee ku aaddan mabaadi', macnaha iyo muhimadda shaqaale dawladeed. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada | Xilli gaaban |
| | Meel-marin wax-ka-bedelka *Sharciga Shaqaalaha Rayidka* oo hadda hor-yaal Baarlamaanka Federaalka JFS. | Baarlamaanka Federaalka ee JFS | Xilli gaaban |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **mudnaan, Mihnad, Loona dhan yahay.** | Sameyn Siyaasad Shaqaaleysiin Qaran oo cad, lehna ujeeddo. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bushada; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli gaaban |
| | Dhisid siyaasado cad oo ku aaddan shaqo-ka-eryid, kor-u-qaadidda shaqo, horumarinta shaqo, wax-dheefyada, mabaadi'da, kamid-ahaanshaha iyo takoorka, caafimaadka iyo daweynta, iwm. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bushada; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli gaaban |
| | Casriyeyn iyo dib-u-qaabayn Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dawladda si uu noqdo waxtar, xarun maareyn kheyraadka aadanaha oo midaysan oo xayeysiisa jagooyinka oo leh qeexitaano shaqo oo cad iyo waxqabadyada shaqo ee laga filayo. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bushada | Xilli gaaban |
| | Dhisid nidaamyo maareyn waxqabad ku saleysan natiijooyin. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bushada; Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dawladda | Xilli dheer |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Sameyn qaab-dhismeedyo maamuleed oo si cad u qeexan ee ku aaddan dhammaan HWW (MDAs). | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada; Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dawladda. | Xilli gaaban |
| | Baahinta natiijada laga helay Hanti-dhawrka Shaqaalaha Rayidka ah ee 2018 iyo hirgelinta talooyinka. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada. | Xilli gaaban |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Sameyn iyo meel-marin xeerka asluubta iyo anshaxa ee shaqaalaha dawladda. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada; Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dawladda. | Xilli dheer |
| | Dejin ansixino maamul/anshax-marino cadcad ee ku aaddan xad-gudubka xeerka anshaxa ee shaqaalaha dawladda. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada; Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dawladda. | Xilli dheer |
| | Bilowga nidaam abaal-marino shaqaalaha dawladda ee qaranka si loo aqoonsado hufnaanta iyo adeeg-wanaagga; qabasho munaasabado ansixin shaqaalaha rayidka ah. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada. | Xilli gaaban |
| | Sameyn nidaam darajo mushaar-bixin oo si cad u qayaxan sidaas awgeed mushaarooyinka shaqaalaha rayidka ah waxay u dhigmayaan mas'uuliyadaha. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada. | Xilli gaaban |
| | Dhisid aalado lagu kordhiyo kartida shaqaalaha rayidka ah oo uu kamid yahay balse aan ku koobnayn machadka tababarka shaqaalaha rayidka ah. | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada. | Xilli dheer |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **5**<br>**HAB DHAQANO:**<br>**Abuuridda Bulsho diidan Musuq-maasuq** | Qiyamyada mabaadi' ee caadiga ah iyo hal-beegyada ee heer wasiir iyo agaasin ee loo marayo dib-ugu-noqoshooyinka hufnaanta iyo dareensanaanshaha mabadi'da. | Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli gaaban |
| | Dhammaan wasiirrada iyo agaasimeyaasha waxay saxiixayaan ballan-qaadyo hufnaan ee dhammeystiran oo lagu hor saxiixayo munaasabado shaacsan. | Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli gaaban |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Qabasho hawlo waxbarasho dadweyne oo mug leh (adeegsi barnaamijyada warbaahinta iyo raadiyaha, khudbooyin diineed, hoggaamiyeyaal siyaasadeed, iyo manhaj dugsi/jaamacad) si loo dareensiiyo bulshada waxa uu yahay musuq-maasuq, waxyeellooyinkiisa mabaadi' iyo dhaqaale iyo raad-reebyada qaanuuneed ee ku shuqlanaanta hawl-qabadyada musuq- | Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta; Wasaaradda Waxbarashada, Hidaha iyo Tacliinta Sare; Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha; Wasaaradda Cadaaladda. | Waa socdaa/ Muddo dheer |
| | Diyaarin iyo faafin Heshiisyada Adeegga Muwaadinka iyo in la xaqiijiyo in ay fahmeen oo ayna saxiixeen shaqaalaha dawladdu. | Dhammaan MDAs; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli gaaban |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Faafinta dhammaan khidmadaha iyo canshuuraha ku lamaansan xeerka adeegyada dadweynaha sidaas awgeed waxay si qayaxan ugu muuqanayaa adeeg-heleyaasha. | Dhammaan Khidmad-ururinta MDAs. | Xilli gaaban |
| | Sameyn aalado cabashooyin dadweyne oo la heli karo, waxtar leh, laguna kalsoonaan karo halkaasoo ay dadweynuhu uga warbixin karaan eedaymaha ama oggaalada la xiriira Musuq-maasuqa. | Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Dal-xiiska; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli gaaban |
| | Qabasho Nugaylada Qiimeynada Musuq-maasuqa (NQM) ee kharash-gelidda ugu sarreeya ee MDAs | Wasaaradda Qorsheynta; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli dheer |
| | Qabasho NQM ee sharci-dejinta | Wasaaradda Qorsheynta; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli dheer |
| | Qabasho NQM ee garsoorka | Wasaaradda Qorsheynta; Wasaaradda Cadaaladda. | Xilli dheer |
| | Dhisid aalado in la ururiyo, la darso laguna faafiyo macluumaad dhacdada iyo goobta hawl-qabadyada musuq-maasuqa ee ka jira Soomaaliya. | Wasaaradda Qorsheynta | Xilli dheer |